Luulyo 2026

# Dhismaha Dowlad-goboleedka
# Hirshabeelle
## Caqabadaha iyo Fursadaha

# *Dhismaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle:*
# *Caqabadaha iyo Fursadaha*

Luulyo 2026

**Xuquuqda daabacaaddan © 2026 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2026.**

# Shaxanka Tusmooyinka


Nuxurka Diraasadda 4

Milicsiga Sooyaalka 5

1. Hordhac 6

1.1 Joogitaanka Al-Shabaab iyo Kala-furfurka Beelaha 9

2. Habraaca Cilmibaadhista 10

3. Geeddi socodka Dhismaha dowlad goboleedka Hirshabeelle 11

3.1 Macnaha Taariikheed iyo Arrimaha Sababay 11

3.2 Jilayaasha Muhiimka ah iyo Saamilayda 14

3.3 Hannaanka Wada-xaajoodka iyo Loollanka Awood-qaybsiga 15

3.4 Qaab dhismeedka Dastuuriga ah iyo Naqshadeynta Hay'adaha 17

3.5 Falanqaynta habsami socodka Dhismaha Maamulka 17

4. Caqabadaha Maamul ee Hirshabeelle 19

4.1 Xasillooni darro Siyaasadeed iyo caqabadaha maamulka 19

4.2 Saameynta Kala qaybsanaanta Bulshadu ay ku leedahay Dawladnnimada 22

4.3 Doorka Hormuudka iyo Loollanka Awoodda 26

5. Caqabadaha Midnimada iyo Xasilloonida 27

5.1 Kala-qaybsanaanta Beelaha iyo Kala-daadsanaanta Siyaasadeed 27

5.2 Arrimaha Amniga ee La Xiriira Caqabadaha Maamulka 28

5.3 Kalsooni-darrada Bulshada iyo God-daloolooyinka Maamulka 29

6. Gunaanad 29

7. Tallooyin Siyaasadeed 30

8. Tixraacyo 32

# *Nuxurka Diraasadda*

Dhismaha dowlad goboleedka Hirshabeelle, oo la aasaasay sannadkii 2016, kadib mideyntii gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe, waxa uu ahaa tallaabo muhiim ah oo ku saabsan hirgelinta nidaamka federaalka Soomaaliya, balse isla mar ahaantaana dhaliyay muran siyaasadeed oo qotodheer. Habkii loo maray dhismaha Dawladda federaalka Soomaaliya (DFS) hormuud u ahayd, si loo buuxiyo shuruudaha dastuuriga ah, loona fududeeyo qabsoomidda doorashooyinka ayaa si weyn loogu dhaliilay in degdeg uu ku jirey nidaamka, sidoo kale sinnaan la'aan iyo wadatashi la'aanna ay jirtay, taas oo sii xoojisay tabashooyin horey u jiray oo u dhexeeyay daneeyeyaasha muhiimka ah ee Hirshabeelle. Tabashooyinkan, oo salka ku haya saami-qaybsiga qabiillada, matalaad la'aan, iyo aragtiyo la xiriira in reeraha qaar laga takooray siyaasadda. Dhammaan arrimahani waxa ay si toos ah u wiiqeen sharciyadda iyo waxqabadka dowlad goboleedka.

Dhinaca bulshada iyo siyaasadda, beelaha sida Xawaadle iyo Abgaal ayaa door muuqda ku leh qaab dhismeedka awoodda, halka beelaha kale ay dareemayaan in la baal maray. Isku dheelitir la'aantan, oo ay weheliso muranno ku saabsan hannaanka isku xirnaanta beelaha, ayaa sii xoojisay kala furfurka Hirshabeelle bulsho ahaan iyo siyaasad ahaanba.  Tani waxa ay si toos ah ugu milantay xaaladda amni ee DG, taas oo ay saameyn ku leeyihiin jilayaal kala duwan sida Al-Shabaab, maleeshiyaad beeleed, gaar ahaan Macawiisley, Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed, iyo ciidamada Midowga Afrika. Inkasta oo Macawisleydu ay door muhiim ah ka qaateen la dagaallanka Al-Shabaab, haddana kooxdaasi waxa ay weli ka faa'iidaysanaysaa daldaloollada dawladnimo iyo kala qaybsanaanta beelaha si ay u sii joogteyso saameynteeda taban

Qaab dhismeedka siyaasadeed ee Hirshabeelle waxaa si weyn u saameeyay heshiisyo ay gaareen kooxo eliid ah (elite), kuwaas oo ku dhisnaa dano isweydaarsi (transactional politics), iyaga oo mudnaanta siiyay xasillooni ku meel gaar ah, halkii laga dhisi lahaa maamul loo dhan yahay iyo xasillooni waarta. Doorka xooggan ee DFS ee dejinta awood qaybsiga iyo qaabeynta hay'adaha ayaa xaddiday ka qaybgalka bulshada, taas oo keentay dastuur kumeelgaar ah oo si degdeg ah loo ansixiyay balse aan helin isafgarad ballaaran oo lagu dhanyahay. Habkan kor kaga keenka ah ayaa isaguna tabardaro ku riday kalsoonida lagu qabo hay'adaha Maamul-goboleedka, isla markaana sii adkeeyay caqabadaha haysta dowlad goboleedka Hirshabeelle.

Caqabadaha dawladnimo ee Hirshabeelle waa kuwo lakabyo ah oo isku murugsan, waxaana ka mid ah khilaafaad aan weli la xallin oo la xiriira matalaadda beelaha, qaybsiga kheyraadka, iyo caasimadda dowlad-goboleedka. Heshiiskii 2016 ee Jowhar u asteeyay caasimadda iyo in xilka madaxweynenimada la siiyo beesha Xawaadle ayaa la jebiyay sannadkii 2020, markii jagadaas loo wareejiyay beesha Abgaal, taas oo sii xoojisay tabashooyinka siyaasadeed ee tan iyo bilowgii sii tarmayey. Sidoo kale, soo if baxa maamul barbar socda midkan oo lagaga dhawaaqay Hiiraan, gaar ahaan Beledweyne, ayaa sii adkeeyay xaaladda maamulka iyo amniga, iyada oo abuuraysa firaaq awood iyo hoos u dhac ku yimaadda adeegyada iyo nolosha bulshada.

Dhanka kale, hababka dhaqanka ee xallinta khilaafaadka, inkastoo lagu kalsoon yahay, hadana, marar badan waxay ku fashilmaan in si dhab ah u xalliyaan sababaha asaasiga ee keenaya cooladahan. Halka maxkamadaha Al-Shabaab ay heleen soo jiidasho sababo la xiriira degdegga iyo fulintooda go'aannada. Dhanka kale, nidaamka iliidka hoggaamineed ayaa weli saameyn weyn ku leh siyaasadda Hirshabeelle, iyada oo go'aannada badankoodu ka tarjumayaan danaha beelaha halkii ay ka noqon lahaayeen kuwo ku dhisan danaha shacabka iyo isla xisaabtan. Isla markaana musuqmaasuqa iyo dano isweydaarsiga siyaasadeed, ayaa sii wiiqayaan xasilloonida, iyaga oo ka dhigaya Maamul-goboleedka mid aan si wax ku ool ah uga jawaabi karin caqabadaha dawladnnimo iyo kuwa amni ee horyaalla.

# Milicsiga Sooyaalka

Hirshabeelle waxaa la aasaasay sannadkii 2016, kadib markii la mideeyay gobollada Shabeellaha Dhexe iyo Hiiraan, iyada oo caasimadna looga dhigay degmada Jowhar.[1] Hirshabeelle waxa ay leedahay cabir dhul oo dhan 56,000 km², waxa ayna xuduud la leedahay Itoobiya dhanka galbeed iyo Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed oo ay ka mid yihiin gobollada Shabeellaha Hoose, Bay iyo Bakool, dhanka Koonfur iyo koonfur bari waxa ay xad kala wadaagtaa Banaadir iyo badwaynta Hindiya, dhanka waqyooyina Galmudug.

Sida ku cad sahankii la sameeyay 2014, qiyaasta dadweynaha Soomaaliya, maamulka waxaa deggan qiyaastii 1.03 milyan oo qof.[2] Dadkaas, ku dhawaad 19% waxay ku nool yihiin magaalooyinka, 37% waxay deggan yihiin miyiga, halka 34% ay yihiin dad reer guuraa ah. Sidoo kale, maamulka waxaa ku sugan tiro badan oo barakacayaal gudaha ah (IDPs), kuwaas oo gaaraya qiyaastii 10% tirada guud ee dadka, taas oo ka dhalatay colaadaha ka jira gobolka. Qaybahaan mararka qaar waxa ay si isku raran ah ugu noolyihiin, meelaha ay beeraha iyo xoolo-dhaqashadu isku dhex jiraan, sida hareeraha webiyada.

Iyada oo xaaladdaas la tixraacayo, cilmi baaristan waxa ay diiradda saareysaa habka samaysanka Dowlad Hirshabeelle iyo caqabadaha ka jira, si wax looga qabto arrimaha muhiimka ah ee saameeya maamul wanaagga, xasilloonida, iyo horumarka. Waxa ay falanqaynaysaa qaab-dhismeedka Dowladda Hirshabeelle, iyada oo si gaar ah u eegaysa sida loo dhisay iyo caqabadaha waaweyn ee halis gelin kara midnimadeeda iyo sii jiritaankeeda ka maamul-goboleed ahaan.

Falanqayntani waa mid muhiim u ah samaynta go'aamo siyaasadeed oo ku saleysan caddeyn, horumarinta mashaariic waara, iyo ka qayb qaadashada doodaha ku saabsan dhismaha dawladnimada Soomaaliya.

1. Janel B. Galvanek, 'Grass-Roots Dialogue in Hirshabelle State Recommendations for Locally-Informed Federalism in Somalia,' Berghof Foundation Project report, May 2017, 3.
2. Somalia National Bureau of Statistics (Formerly Directorate of National Statistics, Federal Government of Somalia), Somali Health and Demographic survey - Hirshabelle Report 2021.

Intaa waxaa dheer, cilmi baaristu waxa ay soo jeedinaysaa xalal suurtagal ah oo lagu wajahayo dhibaatooyinka maamulka ee soo jireenka ah, waxa ayna kor u qaadaysaa oo iftiiminaysaa fahamka xiriirka adag ee ka dhexeeya nidaamka qabiilka iyo dhismaha dawladnimada. Ugu dambayn, waxa ay diraasaddu rabtaa ina ay bixiso aragtiyo waxtar leh oo hagaya daneeyayaasha si loo xoojiyo heshiiska siyaasadeed ee Hirshabeelle, loona gaaro xasillooni waarta.

Ugu danbayn, daraasaddu waxa ay soo jeedinaysaa tallooyin lagu horumarinayo maamulka iyo isku duubnida bulshada Hirshabeelle.

# 1. Hordhac

Hirshabeelle waa gobol dhaqaale ahaan muhiim ah, siiba beeraha iyo xoolo dhaqashada, leh dhul dihin iyo taariikh dheer oo dhanka wax soosaarka beeraha ah. Gobolku wuxa uu hoy u ahaa mashaariic waaweyn sida beerista qasabka, suufka, nidaamyada waraabka, iyo kalluumeysi kobcaya.[3] Webiga Shabeelle, oo ka soo bilaabma dhulka sare ee Itoobiya, ayaa ah isha ugu weyn ee biyaha ee taageerta howlaha beeraha iyo waraabkaba. Inkasta oo awooddaas jirto, gobolka wuxuu wajahaa caqabado ay ka mid yihiin roob yari, khilaafaad bulsho oo ka dhasha daaqa iyo dhibaatooyin la xiriira amniga iyo maamulka sida musuqmaasuqa, matalaad la'aan beelaha qaar ay qabaan, iyo isla xisaabtanka oo hooseeya.[4] Sidaa oo ay tahay, Hirshabeelle waxa ay kaabiga ku haysaa Muqdisho oo xarun ganacsi oo muhiim ah iyo wadooyinka isku xidha ilaa Beledwayne. Hirshabeel waxa ay haysataa fursad ay ku noqon karto meel istiraatiiji ah oo muhiim u ah ganacsiga beeraha iyo xoolaha. Wax ka qabashada caqabadaha aan kor ku xusnay ayaa lamahuraan u ah xasilloonida iyo horumarka dowlad goboleedka.

Dhismaha Hirshabeelle sannadkii 2016 waxa haleeyay go'aanno ku dhisnaa dano siyaasadeed oo waqti dhow ah iyo tabashooyin soo jireen. Gobolka Hiiraan, oo la aasaasay sannadkii 1954 isla markaana ka mid ahaa siddeedii gobol ee asalka u ahaa ee Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed, wuxa uu muddo dheer ahaa mid aan wax isbeddel ah lagu samayn, halka gobollo kale la sameeyay xilligii dawladdii milatariga. Arrintani waxa ay dhalisay dareen liidid iyo hoos udhigid ka dhex abuurmay bulshada reer Hiiraan. Madaxweyne Sheekh Shariif ayaa mar dambe Hiiraan u kala qaybiyay laba gobol, tallaabo loogu talagalay in ay u qalanto inay noqoto dowlad goboleed, taas oo ah aragti taariikhi ah oo inta badan la iska indho tirayey.

3. Sheikh, Abass Kassim. "Conflict Assessment Report: Hirshabelle State, Somalia."
4. Rift Valley Institute. "Hirshabelle Federal Member State Profile."

Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ayaa si degdeg ah u mideysay Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe, iyada oo mudnaanta siisay jadwalka doorashooyinka federaalka halkii laga hubinlahaa dhismaha dowlad goboleed macno yeesha, reer Hirshabeellena waxtar u leh, Shabeellaha Dhexe lafteedu waxa ay ka go'day gobolka Banaadir 1970-meeyadii, taas oo keentay in taageerayaasha dowlad goboleedka Hiiraan ay u arkaan isku darkani in uu yahay mid aan sal taariikheed lahayn oo siyaasad ahaana caddaalad darro ah.

Heshiiska siyaasadeed ee lagu dhisay Hirshabeelle wuxa uu horseeday in xilalka sare ay gacanta ku dhigaan beelaha Abgaal iyo Xawaadle, iyada oo la isku dayay in la ilaaliyo isu dheellitirka awoodda u dhexeysa labada beelood. Sidaa oo ay tahay, iyaga oo haya jagooyinka fulinta, haddana labada beelood waxa ay tiro ahaan ku yar yihiin kuraasta baarlamaanka, taas oo muujinaysa farqiga u dhexeeya awoodda fulinta iyo matalaadda sharci dejinta. Qaabkan awood qaybsiga ah waxa uu meesha ka saaray matalaaddii beelaha kale, isla markaana si dhab ah ugama tarjumayo qaab dhismeedka dimugrafiyadeed [bulshadeed] ee gobolka. Intaa waxaa dheer, geeddisocodka dhismahu waxa uu ahaa mid degdeg iyo sinnaan la'aan lagu unkay, kaas oo dhaliyey diidmo xooggan, siiba gudaha Hiiraan, halkaas oo kooxo badan ay ka hor yimaadeen isku darka isla markaana dalbadeen dowlad goboleed u gaar ah Hiiraan.

Xiisadahaas ayaa ugu dambayn isku beddeshay xasilloonidarro siyaasadeed oo baahsan taas oo muujisay karaan yarida hay'adihii dawladeed. Doorashadii muranka dhalisay ee Cali Cabdullaahi Xuseen "Guudlaawe" sannadkii 2020, oo ay wehelisay adeegsiga maleeshiyaad beeleed si loo xakameeyo mucaaradka, ayaa sii qoto dheereysay xiisadda. Dad badan ayaa u arkay gacan u gelinta beesha Abgaal ku labadii jagoba (xilka madaxweynenimada iyo caasimadda Jowhar) ay jebisay [khiyaantay] heshiiskii hore oo artinkaas ay uga gashay beesha Xawaadle, taas oo sii hurisay cadho [ka xumaansho] kale oo siyaasadeed isla markaana wiiqday sharciyadda Hirshabeelle iyo sidii ay u noqon lahayd dowlad goboleed si dhab ah u shaqayn kara.

Hirshabeelle weli waxa ay la tacaalaysaa muranno qotodheer oo la xiriira caasimadda iyo awood qaybsiga madaxweynenimada. Bulshada Hiiraan, tabashooyinku waxa ay ka soo jeedaan luminta kaalintoodii taariikheed iyo hoos u dhigidda Beledweyne oo ah magaalo ka weyn kana jaadad badan marka loo eegayo bulshada ku dhaqan, taas darteedna ka mudan Jowhar doorka Caasimadnnimada. Qaar badan waxa ay aaminsan yihiin in Hiiraan maadaama ay ahayd gobol asalka ah, ay ahayd ina ay iyadu la wareegto Shabeellaha Dhexe halkii ay hoos tegi lahayd. Xiisaddu waxa ay sii xoogaysatay markii DFS ay si xoog ah ku joojisay shirkii Beledweyne 2016, taas oo keentay in odayaasha qaarkood qaadacaan geeddi socodkii Jowhar.

Inkasta oo Jowhar loo asteeyay caasimad, isla markaana xilka madaxweynenimada loo qoondeeyay Xaawadle, kaas oo ahaa heshiis ay DFS fududaysay, haddana wareejintii xilkaas oo si kas ah loogu wareejiyay Abgaal sannadii 2020, ayaa mar kale kicisay dareenka beesha Xawaadle oo khiyaano u aragtay dhacdadaas, dareenkaas oo islamarkiiba ay ka dhalatay kala qaybsanaan siyaasadeed.[5]

Docda kale, bulshada Shabeellada Dhexe waxa ay muujiyeen aragtiyo ka duwan. Waxa ay tilmaameen in masaafada fog ee Beledweyne iyo u dhowaanshaha xadka Itoobiya ay keenayaan caqabado amni iyo maamul. Waxa ay sidoo kale ku doodeen in isku duubnida bulshada Hirshabeelle ay ka xoog badan tahay dowlad goboleeddada kale sida Galmudug iyo Jubbaland. Sidoo kale, waxa ay muujinayeen in beesha Xawaadle ay gobolka Shabeellada Dhexe degaan xooggan ay ku yihiin, taas oo muujinaysa baahida dib u heshiisiin gudaha beelaha ah halkii laga abuuri lahaa kala qaybsanaan goboleed.

Dhanka qaab dhismeedka dawladnimada, shuruudaha lagu qaybsado 99-ka kursi ee baarlamaanka Hirshabeelle weli ma cadda, taas oo dhalisay cabashooyin la xiriira matalaadda. Dadaallada lagu doonayay in lagu daro beelo kale oo badan ayaa horseeday in golaha wasiirradu noqdo mid aad u ballaaran, iyada oo Hirshabeelle ay leedahay 82 xubnood oo gole wasiirro ah, kuwaas oo qaarkood aysan si buuxda u shaqeyn, taasina waxa ay hoos u dhigtay waxqabadka. Jagooyinka amniga iyo shaqaaleysiinta hay'adaha dawladdu waxa ay inta badan ku salaysan yihiin saami qaybsiga beelaha, taas oo sii hurinaysa tabashooyinka isla markaana wiiqaysa awoodda dowlad goboleedka ee soo xulista shaqaale karti leh.[6]

Khilaafaadka beelaha gudahooda ah iyo kuwa kala dhexeeya beelaha deriska la ah ayaa aad ugu badan gobolka, waxaana ka mid ah, muranno la xiriira lahaanshaha dhulka, khilaafaadka khayraadka ku saabsan iyo ceshiimooyin [iskudhacyada] ka dhexeeya xoolo dhaqatada iyo beeraleyda, iyo isku dhacyo siyaasadeed oo la sii huriyay. Gaar ahaan khilaafaadka dhulka ee u dhexeeya beelaha waa mid aad u sarreeya. Jiritaan laa'aanta dukumentiyo caddeynaya lahaanshaha iyo seesid la'aanta dhulka [xadayn la'aanta dhulka] ayaa sii xoojinaya arrimahan iyo iyada oo uu marwalba jiro rabitaan iyo damac dhulbalaarsi ah, waxaana dhacday in reero badan ay sheegtaan dhul isku mid ah, iskuna adeegsadaan hub si loo gaaro damacaas. Dhanka kale, maleeshiyaad beeleedka ayaa si joogto ah u sameeya isbaarooyin si ay u ilaashadaan dhulkooda taas oo horseedda rabshado, iyo falal aargoosi ah.[7]

Ugu danbeyn, khilaafaadka ku salaysan kheyraadka ee ka jira dowlad goboleedka iyo guud ahaan dalka waxaa sii xoojinaya saameynta isbeddelka cimilada, oo abuuraysa xaalado halis ah sida abaaraha iyo fatahaadaha, iyo burburka deegaanka. Gaar ahaan Hirshabeelle, xaaladaha isbeddelka cimilada ee darani waxa ay si dadban u saameeyeen beeraleyda iyo xoolo dhaqatada, iyaga oo keenay hoos u dhac ku yimaadda wax soosaarkii iyo kheyraadkii guud. hoos u dhaca kuyimid khayraadka yaa kordhisay tartanka u dhexeeya beelaha, taas oo ugu dambayntii kicisa colaado iyo qalaalaase is dabo joog ah.

5. Ibid.
6. Platform for Political Dialogue and Somali Public Agenda. "Hirshabelle's Political Settlement: Opportunities for Meaningful and Inclusive Political Processes." Policy Brief SDP.01, February 2023.
7. Sheikh, Abass Kassim. "Conflict Assessment Report: Hirshabelle State, Somalia."

# 1.1 Joogitaanka Al-Shabaab iyo Kala-furfurka Beelaha

Xaaladda amni ee Hirshabeelle, waxaa si weyn u saameeyay joogitaanka baahsan ee kooxda Al-Shabaab, taas oo weli gacanta ku haysa dhul ballaaran oo miyiga ah iyo marinno sahay oo istiraatiiji ah. Xakamayntaasi waxa ay u sahashay kooxda helista hubka iyo dagaalyahanno fallaago ah, sidoo kale waxa ay carqalad ku haysaa ganacsiga iyo isu socodka xorta ah ee bulshada.

Intii lagu jiray xilligii ka horreeyay doorashadii madaxweynaha federaalka ee May 2022-dii, maleeshiyo beeleed u badan beesha Xawaadle ayaa qaaday ol'olle militari oo ay ku doonayeen in ay iskaga caabiyaan  weerarrada Al-Shabaab. Dadaalkaasi si dhakhso ah ayaa uu u istaagay, kadib markii ay timid kala qaybsanaan gudaha beesha ah. Arrintan waxaa sii xoojiyay isdhexgalka murugsan ee siyaasadda gudaha, oo ay ka mid yihiin: samaysanka maamullo is barbar socda oo ka curtay Hiiraan kuna koobnaa beesha Xawaadle, isla markaana ay diideen beelaha kale ee Hiiraan; cabashooyinka beelaha kale ee deegaanka; iyo taageero la'aanta hay'adaha dowlad goboleedka iyo kuwa federaalka oo markooda horeba awood yaraa. Isku darka arrimahan ayaa horseeday in hawlgalladii ka dhanka ahaa Al-Shabaab ay istaagaan, ama ay gebi ahaanba fashil u muuqdaan.

khilaafyada beelaha ee sii socday kadib ol'olahaas 2022 waxa ay si cad u muujinayaan awood la'aanta Hirshabeelle iyo dawladda federaalka Soomaaliya ee maareynta khilaafaadka beelaha. Maqnaanshaha istiraatiijiyad mideysan oo lagu ballaarinayo maamulka goobaha laga saaray Al-Shabaab, iyo isku dayada kooxda ee lagu carqaladeynayo barnaamijyada xasillinta ee gudaha iyo kuwa caalamiga ah, ayaa sii adkeeyay caqabadaha amni. Kala furfurka gudaha ayaa sidoo kale wiiqay iskaashiga iyo is weydaarsiga xogta ee u dhexeeya dhinacyada hoggaaminaya howlaha militari, taas oo u sahashay Al-Shabaab in ay ka faa'iidaysato daacadnimada iyo xiriirrada beeleed ee gudaha hay'adaha amniga, isla markaana u adeegsato kala qaybsanaantaas si istiraatiiji ah. Natiijadu waxa ay noqotay, in Hirshabeelle noqoto dowlad goboleed sii nuglaanaya oo wajahaya xasillooni darro joogto ah.

Waxaa soo baxaya aragti sii xoogaysanaysa oo ah in dawladda federaalka ay si toos ah u farageliso dib u eegista qaab dhismeedka dastuuriga ah ee Hirshabeelle, gaar ahaan si loo saxo isu dheellitir la'aanta matalaadda beelaha. Inkastoo beelaha Abgaal iyo Xawaadle ay wadajir ahaan ka haystaan wax ka yar 30% kuraasta baarlamaanka, haddana waxa ay sii wataan gacan ku haynta jagooyinka fulinta iyo saameynta ay ku leeyihiin maamulka, iyagoo kaashanaya awoodda hay'adaha fulinta iyo maleeshiyo beeleedyada.  Isku dheelitir la'aantantaas ayaa inta badan si toos ah uga qayb qaadata ismariwaaga siyaasaddeed ee sii xididaysanaya.

Matalaadda baarlamaanka waa in ay si dhab ah uga tarjumtaa qaab dhismeedka bulshada gobolka, iyada oo si gaar ah loo kordhinayo matalaadda bulshooyinka la hayb-sooco, sida beelaha Jareerwayne ee ku nool jiinka webiga. Sidoo kale, waa in mudnaanta la siiyaa in kheyraadka dabiiciga ah si caddaalad loo gaarsiiyo gobolka, iyada oo la sameynayo nidaam dhammeystiran oo ah diiwaangelinta hantida maguurtada ah sida dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda lahaanshaha ee bulshooyinka DG ku dhaqan. Haddiiba la sameeyo dib u habeyntan waa in aan beelaha awoodda leh faraha looga qaadin, balse hay'adaha federaalka ee khibradda u leh maamulka, maareynta khayraadka iyo xuquuqda dhulku si jooogto ah u kor joogteeyaan in aan marnaba laga leexan toobiyaha.

# 2. Habraaca Cilmibaadhista

Daraasaddu waxa ay adeegsatay hab cilmiyeed ku salaysan tayada (qualitative approach) si loo helo aragtiyo qotodheer oo ku saabsan geeddi socodka dhismaha dowlad goboleedka iyo caqabadaha dawladnimo ee ka jira Hirshabeelle. Habraaca cilmi baaristu waa mid isku daraya dib u eegis warbixinno horay u jirey iyo xogo laga uruuriyey goobo Hirshabeelle kamid ah, taas oo u suurtagelisay daraasadda inay dhisto saldhig cilmiyeed adag iyo faham guud oo ku saabsan macnaha iyo duruufaha ay daraasaddu ku saleysan tahay.

Xog ururinta laga aruuriyay goobaha la tagay, waxaa lagu sameeyay laba hab oo waaweyn: Wareysiyo lala yeeshay dad muhiim ah sida wakiillo dawladeed, siyaasiyiin, iyo hoggaamiyayaal bulsho; iyo dood kooxeedyo loo abuuray ururrada bulshada, hoggaamiyayaal, iyo xubno ka mid ah shacabka.

Gaar ahaan, dadka la waraystay waxa ay isugu jireen guddoomiyeyaasha gobollada, duqeyda degmooyinka, wasiirro heer dowlad goboleed ah, xubno ka tirsan baarlamaanka dowlad goboleedka, hoggaamiyeyaasha bulshada, iyo siyaasiyiin heer federaal ah sida senatarro iyo xubno ka tirsan golaha shacabka. Dhanka kale ka qaybgalayaasha dood wadaag kooxeedyada (FGDs) waxaa ka mid ahaa odayaal dhaqameed, culimo diimeed, iyo kooxo bulshada rayidka ah sida dhalinyarada iyo haweenka, kuwaas oo lagu xulay hab xulasho ujeeddaysan (purposeful sampling) si loo hubiyo matalaad dheellitiran oo ka tarjumaysa qaybaha kala duwan ee bulshada iyo aragtidooda ku aaddan Hirshabeelle.

Si loo xaqiijiyo in xogtu tahay mid meteli karta dhammaan qaybaha bulshada Hirshabeelle, waxaa cilmi baarista laga fuliyay magaalooyin muhiim ah sida, Jowhar, Beledweyne, Buulo barde, iyo Cadalle. Magaalooyinkan waxaa si ula kac ah loogu doortay si ay u matalaan xarumaha maamulka iyo sidoo kale bulshooyinka taariikh ahaan la faquuqay, iyada oo la doonayo in la qabto aragtiyo kala duwan oo bulsho, amni iyo kuwo siyaasadeed oo ka imanaya qaybaha kala duwan ee bulshada.

Sidoo kale, waraysiyo dheeraad ah ayaa lagu qabtay Muqdisho, halkaas oo lala yeeshay siyaasiyiin heer federaal ah si loo fahmo xiriirka u dhexeeya heer dowlad goboleed iyo heer federaal, loona helo aragtiyo istiraatiiji ah oo ku saabsan xal u helidda caqabadaha Hirshabeelle.

Habka ururinta xogta waxaa hoggaaminayay cilmi baare khibrad leh oo ay taageerayeen cilmi baarayaal maxalli ah. Inta badan xogta waxaa lagu ururiyay waraysiyo iyo dood wadaagyo kooxeed oo laga duubay codad, ogolaanshaha codadkaasna waxa bixiyey ka qaybgaleyaasha. Waxaa la raacay habraacyo adag oo ilaalinaya sirta xogta. Inta lagu guda jiray habraaca, cilmi baaraha hoggaaminayay ayaa si joogto ah u maamulayay oo u hubinayay tayada xogta, isaga oo si dhow ula shaqaynayay kooxda goobta ku sugan si loo xaqiijiyo helitaanka xog saxan oo hufan.

Habraacan cilmiyeed ee adag wuxa uu suurtogeliyay daraasaddu in si qotodheer u falanqeyso qaab dhismeedka dawladnimada Hirshabeelle, geeddi socodka dhismaheeda, iyo caqabadaha saameynaya midnimadeeda iyo sii jiritaankeeda ka dowlad goboleed ahaan.

# 3. Geeddi socodka Dhismaha dowlad goboleedka Hirshabeelle

## 3.1 Macnaha Taariikheed iyo Arrimaha Sababay

Hanaanka dhismaha dowlad goboleedyada federaalka waxa uu ka dhashay dedaal loo marayay dib u dhiska dawlad Soomaaliyeed oo ay si guud u aqbalaan muwaadiniinteedu. Kadib geeddi socodkii nabaddeed ee Mbagathi iyo dhismaha xukuumadihii kala guurka. Waxaa la dejiyay jadwal iyo hannaan hagaya habraacyada lagama maarmaanka u ah samaynta dowlad goboleedyada federaalka. Tallaabooyinkan waxaa loogu talagalay in lagu suurtageliyo baahinta awoodaha iyo mas'uuliyadaha (devolution) gudaha nidaam federaal ah oo shaqaynaya.

Waxa la ansixiyay dastuur ku meel gaar ah oo u adeegaya qaab dhismeedyada maamul, Hirshabeelle waxa ay dejisay hay'adaha aasaasiga u ah dhismaha dowlad goboleed. Tani waxa ay ka dhigtay dowlad goboleedkii ugu dambeeyay ee dhammaystira geeddi socodka federaaleynta ka hor doorashadii 2016.




**Marxaladihii Muhiimka u ahaa Nabadda iyo Dhismaha Dawladnimada Soomaaliya**

Dhismaha Hirshabeelle waa mid ka askumay isku darka gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe oo horay uga tirsanaa gobolka Banaadir ka hor afgambigii milatari ee 1969. Sida ay muujinayaan waraysiyada lala yeeshay daneeyeyaasha muhiimka ah, isku darkan waxa uu ku salaysnaa heshiis aan rasmi ahayn oo awood qaybsi ah, kaas oo dhigaya in madaxweynaha laga soo doorto qabiilka Xawaadle, halka madaxweyne ku xigeenka laga soo xulo qabiilka Abgaal.  Jawhar waxaa loo asteeyay caasimadda dowlad goboleedka. Iyada oo uu soo dhowaaday waqtigii kama dambaysta ahaa ee lagu dhammaystirayay geeddi socodka federaalaynta Jamhuuriyadda Saddexaad ka hor doorashadii 2017, Dawladda federaalka iyo kooxaha bulshada deegaanka oo ay ku jiraan siyaasiyiin, odayaal dhaqameed, ururrada bulshada rayidka ah, iyo daneeyayaal kale ayaa isugu yimid si ay uga wada xaajoodaan aasaaska iyo saami qaybsiga Hirshabeelle. Arrintani waxa ay ugu dambayn horseeday in Hirshabeelle noqoto dowlad goboleedkii shanaad ee nidaamka federaalka.

Intaa waxaa dheer, beesha caalamka, iyada oo loo marayo Heshiiska Cusub (New Deal) iyo itifaaqiyada Soomaaliya, waxay door muhiim ah ka ciyaareen yagleelidda/dhisidda dowlad [goboleedka Hirshabeelle] ee Soomaaliya sannadkii 2016. Iyadoo ay jiraan digniino ka yimid qaar khubarada ka mid ah, haddana dhinacyada dibadda, oo ay ku jiraan Boqortooyada Midowday (UK), Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay (UN-SRSG), Midowga Yurub, iyo Urur-goboleedka Horumarinta (IGAD), waxay ku cadaadiyeen daneeyayaasha Soomaaliya ee heer federaal iyo Hirshabelle labadaba inay "dhameystiraan khariidadda federaalka." Beesha caalamku waxay ka faa'iideysatay taageeradeeda dhaqaale iyo siyaasadeed [ee ay u fidiso Soomaaliya], iyagoo adkeeyey in dhammaystirka federaalayntu ay lagama maarmaan u tahay kaalmada horumarineed oo sii socota. Alex de Waal ayaa ka faallooday arrintan, isagoo leh, "saamayn ahaan, qulqulka maaliyadda dibadeedi waxa uu sii hurinyaa dhaqdhaqaaga (daynamics) beesha caalamku rabto in ay xakamayso – gaar ahaan marka la eego yareynta kacdoonka (amni-darrada).[8]

8. Skeppström, Emma, and Per Nordlund. "Security, Stabilization and State Formation in Somalia." Swedish Ministry of Defence (2014).

Si kastaba ha ahaatee, geeddi socodka dhismaha dowlad goboleedka waxaa si weyn u wiiqay eedeymo baahsan oo loo jeediyay dawladda federaalka, gaar ahaan in aysan waqti ku filan siin wada tashiyada, heshiis la'aanta dhameystiran ee arrimaha saami qaybsiga, iyo ka reebitaanka qayb kamid ah daneeyeyaasha muhiimka ah, sida odayaal dhaqameed caan ah.[9] Shir heer gobol ah oo loogu talo galay in lagu isugu keeno wakiillo ka kala socda Hiiraan iyo Jowhar ayaa la kulmay caqabado waaweyn, maadaama odayaal badan ay ku gacan sayreen [qaadaceen] ka qaybgalka sababbo la xiriira qanaaco yari ku saabsan matalaadda siyaasadeed.[10]

Sida caadiga ah ee ka jirta dhaq dhaqaaqyada siyaasadeed ee Soomaaliya, gorgortanka iyo heshiisyada awood qaybsiga waa mid ka yimaada isku darka talooyinka odayaasha [wax-garadka] bulshada,, wakiillo beeleed, masuuliyiin dawladeed, iyo jilayaal ka socda ganacsatada gaarka loo leeyahay.[11] Hirshabeelle arrintanteedu waxba sidan kama duwana. Wadatashiyadii horseeday dhismaha dowlad goboleedka waxa ay socdeen muddo 10 bilood ah, waxa ayna inta badan ku dhisnaayeen hannaan kor kaga keen ah (top-down) oo ay hoggaaminaysay dawladda federaalka.

Tan iyo markii la aasaasay, Hirshabeelle waxa ay yeelatay saddex madaxweyne, kuwaas oo dhammaantood lagu soo xulay hab doorasho dadban. Laba ka mid ah waxa ay ka soo jeedeen beesha Xawaadle, halka madaxweynaha hadda, Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe), oo hore u ahaa madaxweyne ku xigeen, uu kasoo jeedo beesha Abgaal. Sida ay wariyeen xog ogaalka muhiim ah,[12] doorashadii Cali Guudlaawe ee 2020 waxa ay jebisay heshiiskii awood qaybsiga, waxaana hawshaas gacan ka gaysatay xukuumaddii joogtay sannadkii 2016-kii. Heshiiskaasi waxa uu qeexayay qaab dhismeedka awood qaybsiga ee waaxda fulinta, isaga oo tilmaamayay sida beeluhu u kala yeelanayaan jagooyinka madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka. Nidaamkan cusub ayaa loo arkay mid jebiyay isudheellitirnaantii, iyada oo xilka madaxweynenimada iyo goobta caasimadda loo fasiray ina ay xoojinayaan awoodda Shabeellada dhexe iyo in Hiiraan saaxadda ka maqnaato.[13]

Doorashadii Cali Guudlaawe waxa ay ahayd isku day lagu dejinayay mucaarad sii kordhayay oo ka dhan ahaa maamulka iyo siyaasadaha madaxweynihii xilligaas, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo. Arrintan waxa ay qayb ka ahayd istiraatiijiyad siyaasadeed oo ballaaran oo lagu doonayay in lagu xoojiyo saldhig taageero oo ka gacan siiya qorshayaashiisa dib uhabaynta iyo kordhinta muddo xileedkiisa. Farmaajo waxa uu aaminsanaa in dhammaystirka doorashada Hirshabeelle ay u horseedi karto in uu ku kasbado taageero dheeraad ah dowlad goboleedyada kale iyo guud ahaan dalka.[14]

9. For discussion on this theme, see Afyare A. Elmi, Decentralized Unitary System: A Middle Ground Solution for Somalia. Published by Doha Institute.
10. See De Waal, Alex. "Somalia synthesis paper, 2017." (2017).Available at https://eprints.lse.ac.uk/100162/4/De_Waal_somalia_synthesis_paper_published.pdf, P. 11
11. Focus Group Discussions.
12. Jowhar conference opens despite Hiiraan elders' boycott. Accessed at: https://hiiraan.com/news4/2016/Jan/103544/jowhar_conference_opens_despite_hiiraan_elders_boycott.aspx
13. Jowhar conference opens despite Hiiraan elders' boycott. Accessed at: https://hiiraan.com/news4/2016/Jan/103544/jowhar_conference_opens_despite_hiiraan_elders_boycott.aspx
14. Focus Group Discussions.

## 3.2 Jilayaasha Muhiimka ah iyo Saamilayda

Riixitaanka ku wajahan dhismaha dawlad federaal ah waxa uu ka dhashay tobannaan sanno oo nuglaansho dawladdeed ah iyo dalabyo sii kordhaya oo ku saabsan baahinta awooddaha, kuwaas oo salka ku haya cabashooyin la xiriira matalaadda, qaybsiga kheyraadka, iyo siyaasad loo dhanyahay.[15]

Guud ahaan siyaasadda Soomaaliya, awoodda siyaasaddeed waxaa si weyn u qaabeeya is dhexgal adag oo u dhexeeya beelaha iyo xidhiidhada beeleed. Xidhiidhadan waxa ay ka muuqdaan dhammaan heerarka dawladnimo iyo bulshada, sidoo kale waxa ay ku jiraan qaybaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahaynba. Jilayaasha ugu muhiimsan ee saaxadda siyaasadeed waxaa badanaa dabada kariixaya taageero-beeleed, awood ay u leeyihiin ururinta kheyraadka iyo dakhliga.[16] Hirshabeelle gudaheeda, beelaha Xawaadle iyo Abgaal ayaa leh saamiga/qaybta ugu weyn ee matalaadda siyaasadeed, halka beelaha kale ay ku leeyihiin door kooban saaxadda siyaasadda iyo amniga. Sidaa oo ay tahay, awoodda beelaha ma aha mid go'an oo hal meel ku kooban; waxa ay ku xiran tahay juqraafi ahaan, iyada oo la adeegsanayo iskuxirnaanta Jifooyin hoosaadka iyo dallado beeleed si loo gaaro dano gaar ah.

Macawisleyda, oo inta badan ka soo jeeda qabiilka Xawaadle, ayaa door amni oo muhiim ah ka qaatay Hirshabeelle iyo guud ahaan dalka, kadib bixitaankii ciidamadii Burundi ee ka tirsanaa howlgalka Midowga Afrika (ATMIS) ee Shabeellaha Dhexe, taas oo abuurtay firaaq amni oo weyn oo gobolka uga dhigtay mid u nugul Al-Shabaab. Ugu dambayn, waxa ay hormuud ka noqdeen hawlgallada militari ee ay taageerto dawladda federaalka ee ka dhanka ah Al-Shabaab.

Doorka Macawisleyda oo ah awood amni oo muhiim ah oo aan la dhayalsan karin, gaar ahaan marka la eego weerarrada badan ee Al-Shabaab ee ka dhaca Hirshabeelle. Iyada oo laga duulayo suurtagalnimada maalgashi ay sameeyaan bulshada deegaanka gaar ahaan qaybta gaarka loo leeyahay, sida dalaga baaxadda weyn ee wax soo saarka beeraha ee gobolka, iyo sida ay ugu dhowdahay Muqdisho. Soo bixitaankooda waxa uu muujinayaa sida ay u sii kordhayso ku tiirsanaanta kooxaha amni ee bulshada ka yimaada, si loo buuxiyo meelaha ka bannaan howlgalka, gaar ahaan meelaha istiraatiijiga ah ee howlgalada Midowga Afrika ee taageerada iyo xasilinta Soomaaliya kawada (AUSSOM).

15. Andrea Carboni, ACLED Africa (2022). A Turbulent Run-up to Elections in Somalia. Accessed at: https://acleddata.com/2021/04/07/a-turbulent-run-up-to-elections-in-somalia/
16. Somali Public Agenda (2020). The Hirshabelle election conundrum. Accessed at: https://somalipublicagenda.org/the-hirshabelle-election-conundrum/

Hirshabeelle gudaheeda, ilaha dakhliga ugu muhiimsan waxaa ka mid ah isbaarooyinka ku yaalla waddooyinka muhiimka u ah dhaqdhaqaaqa dhaqaale, kuwaas oo ay maamulaan ciidamo kala duwan oo dawladeed iyo kuwo aan dawladda toos u hoos tagin. Goobaha isbaarooyinkaas ay yaalaan, badanaa waxa ay ku dhisanyihiin qaab ku salaysan lahaansho deegaan (autochthony), waxaana ka dhasha muranno iyo khilaafaad ku saabsan cidda maamuleysa iyo sida faa'iidada loo kala yeelanayo. Maleeshiyada beesha, booliska, shabaabka iyo xitaa hay'addo dawladeed oo kale ayaa ku loolama xakamaynta isbaarooyinkan.

Adeegsiga isbaarooyinka si loo helo dakhli (rents) iyo xakameyn, ha ahaato in lagu maalgeliyo hawlgallada ama lagula socdo qulqulka dadka iyo badeecadaha, wuxa uu qayb ka yahay nidaamka adag ee dhaqaalaha siyaasadeed ee dowlad goboleedka, isla markaana si weyn u saameeya dhinacyada siyaasadeed, hadii ay dhaqaale iyo amniba noqon lahayd. Khilaafaadka ka taagan cidda xaqa u leh iyo su'aalaha sharciyaddeed ayaa xaddiday awoodda dowlad goboleedka ee daadajinta maamulka meelaha qaar, halkaas oo mararka qaar awooddu isku darsanto ama ay wajahdo tartan kaga yimaada jilayaal kale. Tani waxa ay si toos ah u wiiqaysaa sharciyadda dowlad goboleedka iyo awooddiisa maamul, isla markaana waxa ay sii xoojisaa tabashooyinka iyo kala furfurka, maadaama tartanka kheyraadka, dhulka iyo daaqa uu noqday mid sii baahaya.

## 3.3 Hannaanka Wada-xaajoodka iyo Loollanka Awood-qaybsiga

Daneeyeyaasha kala duwan ee la waraystay ayaa sheegay in heshiisyadii hore ee saami qaybsiga awoodda ay si weyn u carqaladeeyeen kooxaha hoggaamiyeyaasha (Elite-ka) ah, kuwaas oo go'aannada siyaasadeed u leexiyay dhinac ay ka muuqdaan dano gaar ah oo ka baxsan kuwa guud.[17] Mustaqbalka dowlad goboleedyada federaalka, qaarkood ayaa nasiib darro u leexday jiho siyaasaddeed halis ah (political adventurism), taas oo ku dhex milantay isla markaana ka noqotay qayb ka mid ah xisaab siyaasadeed oo ku dhisan dano is weydaarsi.

Tusaale cad oo arrintan muujinaya waa golaha wadatashiga Qaran (National Consultative Council, NCC), halkaas oo ay ku kulmaan hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyada, dowlad gobolka Banaadir, ra'iisul wasaaraha iyo ku xigeenkiisa, iyo madaxweynaha, si ay uga wada hadlaan arrimaha siyaasadeed, dhaqaale iyo amni ee heer qaran. Kulamadii u dambeeyay ee la xiriiray jadwalka iyo qaabka doorashooyinka ayaa muujiyay in hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyadu aysan si dhab ah u muujin awood go'aan qaadasho oo wax ka qabata baahiyaha degdegga ah ee bulshada ay metelaan.

17. Somalia: A Country Study (1992). https://tile.loc.gov/storage-services/master/frd/frdcstdy/so/somaliacountryst00metz_0/somaliacountryst00metz_0.pdf

Taas beddelkeedna, kulamadan ayaa caan ku noqday ina ay sii xoojiyaan isla dhibaatooyinka iyo hab dhaqannada curyaaminaya dowlad goboleedyadooda.

Tusaale kale oo muujinaya dhaqankaas ku dhisan dano is weydaarsiga waxaa noqon kara, sida xubnaha NCC iyaga oo adeegsanaya magaca is afgarad siyaasadeed, ay si fudud u kordhiyeen muddo xileedyadooda sannadihii 2022, 2023, ilaa iyo 2024-tii, iyada oo aan si dhab ah loo raacin habraacyadii sharciyeed iyo kuwii dastuuriga ah. Kordhintan waxaa lagu macneeyay in ay lagama maarmaan u tahay xasilloonida iyo diyaarinta doorashooyinka, balse waxa si weyn loogu arkayey tallaabooyin u adeegaya danahooda gaarka ah, kuwaas oo sii xoojinaya awoodda hoggaamiyeyaasha isla markaana meesha ka saaraya habsami socodkii dimuqraadiyadeed iyo qaybaha kale ee bulshada.

Isla jihadan siyaasadeed ee halista (isbiimaynta) ah ayaa sidoo kale ka muuqata aqoonsigii dhowaan la siiyay SSC-Khaatumo oo loo aqoonsaday dowlad goboleed federaalka hoos yimaada, iyada oo aan la raacin habraacyadii dastuuriga ahaa. Tallaabooyinka halka dhinac ah, waxa ay sii kordhinayaan ismari waaga siyaasadeed, isla markaana waxa ay minjaxaabinayaan himilada kooxaha sida beesha Xawaadle oo doonaya ina ay dhistaan dowlad goboleed u gaar ah reer Hiiraan. Ka leexashada habraacyada dastuuriga ah waxa ay hoos u dhigaysaa sharciyadda dalabaadka siyaasadeed ee gudaha, waxa ayna muujinaysaa sida go'aamada ay qaadanayaan hoggaamiyeyaasha (eliidku) ay u sii hurinayaan kala qaybsanaanta beelaha isla markaana hoos ugu dhigayaan isku xirnaanta nidaamka federaalka. Maqnaanshaha is afgarad dhab ah iyo natiijooyin la hirgelin karo ee heer Qaran ayaa sidan si la mid ah uga muuqda heerka dowlad goboleed, taas oo sii waddaysa xasillooni darrada isla markaana hoos u dhigaysa kalsoonida lagu qabo geeddi socodka siyaasadeed.

Maanta Hirshabeelle, heshiisyada siyaasadeed iyo saami qaybsiga awoodda iyo kheyraadka waxa ay ku dhisan yihiin dano is weydaarsi, badalkii lagu dhisi lahaa kuwo ku salaysan aragti ballaaran oo ka tarjumaysa baahiyaha iyo himilooyinka bulshada.[18] Arrintan waxa ay si ku meel gaar ah u dejisay cabashooyinka sii kordhaya, balse waxa ay keenaysaa in siyaasadaha muhiimka ah iyo dib u habeynta lagama maarmaanka ahi aysan helin sharciyad si buuxda u taageeri doonta.

Xidhiidhka adag ee u dhexeeya hababka go'aan qaadashada iyo saameynta awoodda beelaha ayaa ah caqabad si qotodheer u saameysa dhammaan heerarka dawladnimada. Doorka dawladda federaalka ee Hirshabeelle lama dhayalsan karo, maadaama ku tiirsanaanta kheyraadka dibadda iyo taageerada siyaasadeed ee heer federaal ay sii xoojiso kala furfurka (kala jajabka) isla markaana hoos u dhigto degdegga loo baahan yahay si wax looga qabto arrimaha asaasiga ah ee dheeliga ku keenaya sharciyadda iyo awoodda dowlad goboleedka.

18. Focus Group Discussion (Cadale),

Hoggaanka dowlad goboleedka, iyaga oo si fiican uga warqaba xaddidaadaha awooddooda ee saameynta istiraatiijiyadaha siyaasadeed iyo amni, ayna ogyihiin ku tiirsanaantooda wayn ee dawladda federaalka. Waxaa suuragal ah in hab dhaqanka ku salaysan dano is weydaarsi uu sii socdo, taas oo sii qalloocinaysa isu dheellitirnaanta awoodda iyo kheyraadka, isla markaana sii xoojinaysa kala qoqobnaanta iyo tabashooyinka. Natiijada arrintan waxa ay noqotay jahawareer sii kordhaya iyo hoos u dhac ku yimaadda rabitaan siyaasadeed ee daneeyeyaasha muhiimka ah.

## 3.4 Qaab dhismeedka Dastuuriga ah iyo Naqshadeynta Hay'adaha

Dastuurka Hirshabeelle weli waa mid kumeelgaar ah, waxaana diyaariyay guddi dastuur oo heer dowlad goboleed ah, waxaana ansixiyay baarlamaanka cusub ee dowlad goboleedka bishii Oktoobar 2016. Habkii loo maray dhismaha dowlad goboleedka, geeddi socodkani waxaa loo arkay mid degdeg uu ku jiro, isla markaana weli la kulmaya diidmo xooggan oo ka imanaysa xubno cabasho ka qaba maqnaanshaha wadatashi ku filan. Dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu u adeegaa qaab dhismeed sharciyeed oo qeexaya maamulka, xeerarka, iyo shaqooyinka dawlad goboleedka iyo hay'adihiisa. Dhammaystirkiisa iyo hirgelintiisa ayaa caqabad kala kulmaya sharciyadda muranka ka taagan dowlad goboleedka dhexdiisa ee ka imanaysa bulshada uu matalo.

Habsami u socodka dastuurka Hirshabeelle waxa uu muujinayaa doorkii xoogganaa ee dawladda federaalku ay ku lahayd dhismaha dowlad goboleedka marka loo eego dowlad goboleedyada kale. Heshiisyadii saami qaybsiga waaxda fulinta ee qeexaya qaybsiga awoodda beelaha iyo qaab dhismeedka hay'adaha dawladnimada waxa ay ahaayeen kuwo si weyn uga yimid hannaan korka looga keenay (top-down), mana ahayn geeddi socod ku dhisan taageero bulsho oo ballaaran.[19] Iyadoo la muujinayo dedejinta geeddi socodka, lama samayn wadatashiyo dadweyne oo qoto dheer kuwaas oo xoojin kari lahaa sharciyadda dowlad goboleedka isla markaana yareyn lahaa cabashooyinka , lama na siin fursad ku filan.[20]

## 3.5 Falanqaynta habsami socodka Dhismaha Maamulka

Dhismaha Hirshabeelle oo ku dhisnaa dano siyaasadeed oo degdeg ah (political expediency), waxaa ka maqnaa wadatashi dhab ah oo ku salaysan is afgarad lala yeesho daneeyeyaasha muhiimka ah. Sida ku cad dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, laba gobol ama ka badan oo ka mid ah goboladdii horay u jiray ayaa si ikhtiyaari ah isu raaci kara si ay u dhisaan dowlad goboleed federaal ah.

19. Focus Group Discussions – Elders (Bula Burte).
20. Focus Group Discussion – Elders (Bula Burte).

Haddii gobol uu diido in uu ku biiro, wuxuu sii ahaanayaa mid hoos yimaada maamulka dawladda federaalka. Inkasta oo qaabkani dejinayo xuduud dhuleed oo cad, haddana hirgelintiisa waxaa adkeeya qaab dhismeedka beelaha Soomaaliya, maadaama beeluhu inta badan ku kala firdhisan yihiin gobollo iyo dowlad goboleedyo kala duwan, taas oo ka dhigaysa dhismaha dowlad goboleed loo dhan yahay oo matalaad leh mid weli caqabad joogta ah leh.

Sidaas darteed, caqabadaha la xiriira xakamaynta awoodda iyo kheyraadka, isu soo dhowaanshaha hoggaanka, iyo maamulidda hay'adaha amniga ayaa weli sii jiraya. Siddeed sano kadib aasaaska Hirshabeelle, maamulku waxa uu weli la tacaalayaa tabashooyin aan la xallin oo salka ku haya habkii loo dhisay. Gaar ahaan, horraantii 2024, koox ka mid ah hoggaamiyeyaasha siyaasadeed iyo kuwa bulsho ee beesha Xawaadle ayaa ku dhawaaqay maamul barbar socda oo ka jira Hiiraan, iyagoo sabab uga dhigay ka reebitaanka saami qaybsiga kuraasta baarlamaanka, muranka ku saabsan goobta caasimadda maamulka laga dhigayo, iyo hakinta heshiisyadii hore ee awood qaybsiga ee heerarka fulinta iyo sharci dejinta.[21]

Dib u heshiisiin dhab ah iyo qaybin cadaalad ah oo kheyraadka iyo matalaadda siyaasadeed lagu sameeyo waa lama huraan si dowlad goboleed kasta uu u noqdo mid shaqayn kara. Wax ka qabashada tabashooyinka soo jireenka ah iyo xaqiijinta caddaaladda, iyada oo loo marayo hay'addo shaqaynaya waxa ay u baahnaan doonaan waqti iyo dadaal badan, balse waa lagama maarmaan si loo xaqiijiyo isku duubnida iyo wada shaqaynta. Tallaabooyinkan waxa ay sidoo kale yareynayaan fursadaha ay ka faa'iidaysan karaan kooxaha xagjirka ah ee rabshadaha sameeya iyo jilayaasha kale ee doonaya ina ay ku sii hayaan xaaladda jirta murano awood qaybsi siyaasadeed iyo kheyraadka daaran.

Baahida loo qabo gaaridda metelaad buuxda oo caddaalad ah, horumar iyo dawladnimo isbeddel keeni karta, ma aha mid ku kooban Hirshabeelle oo keliya, balse waa arrin khusaya guud ahaan Soomaaliya. Tobannaan sano oo dagaal sokeeye ah ayaa burburiyay wax kasta oo ka haray dawlad iyo hay'addo shaqeeyaba, iyada oo xitaa ka hor burburkii dawladdu ay jireen tabashooyin la xiriira caddaaladda iyo kheyraadka, kuwaas oo la cabburiyay ama muddo dheer la hakiyay. Baahinta awoodaha dawladnimo iyo qaadashada nidaamka federaalka ayaa ka dhalatay baahi loo qabay in wax laga qabto kalsooni darrada ku saabsan hababka maamul, isla markaana lagu mideeyo dalka kadib tobannaan sano oo colaado ah.

21. https://berghof-foundation.org/work/projects/promoting-reconciliation-in-hirshabelle-state-somalia

# 4. Caqabadaha Maamul ee Hirshabeelle

## 4.1 Xasillooni darro Siyaasadeed iyo caqabadaha maamulka

Xaaladihii horseeday burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya waxaa si weyn loogu aaneeyaa in ay ahaayeen nidaamka oo xakameyn iyo cabburin ku dhisnaa, iyo dadka oo si aan loo aabo yeelin loo kala soocayey marka ay noqoto ka qaybgalka siyaasadda, horumarka dhaqaale iyo mid bulsho. Halganka loogu jiro in la helo matalaad siyaasadeed waxa uu salka ku hayaa taariikh ay ka muuqdaan tabashooyin soo jiray tan iyo xilligii guumeysiga, tabashooyinkaas oo sii xoogeystay kadib xornimadii, isla markaana dhaliyay kalsooni darro baahsan oo u dhexeysa beelaha.[22]

Dhismaha Hirshabeelle oo degdeg iyo hab aan nidaamsanayn ku dhacay ayaa ku guuldareystay in uu ka faa'iidaysto casharradii laga bartay taariikhda dhigan, taas oo noqotay sababta ugu weyn ee keentay hakadka iyo qanacsanaanta la'aanta ku jirta habsami socodka dhismaha dowlad goboleedka, nidaamkiisa dawladnimo, iyo ugu dambayn sharciyaddiisa. Siyaasadda ku salaysan beelaha ayaa si weyn u saameysa sida dawladdu u shaqeyso, iyada oo xoojinaysa aragtida ah in ay u adeegto danaha beelo gaar ah. Tani waxa ay dib u dhigtay horumarka, waxa ayna kordhisay isku dhacyada.[23]

Dawladda Hirshabeelle waxa ay la tacaalaysaa caqabado la xiriira awoodaha xaddidan ee ay haysato,  oo ay ka mid yihiin kheyraad yarida iyo tababar la'aanta, taas oo wiiqaysa awooddeeda ay ku dhex dhexaadin karto khilaafaadka[24] si wax ku ool ahna wax uga  qaban karto . Hababka xalinta khilaafaadka ee dhaqanka ah, sida dhex dhexaadinta odayaasha, ayaa weli ah kuwa ugu badan ee la adeegsado si loo gaadho caddaalad.

Maxkamadaha Al-Shabaab ayaa sidoo kale noqday beddel loo adeegsado xalinta khilaafaadka, sababo la xiriira awoodda ay u leeyihiin fulinta go'aannada iyo degdegga ay ku xalliyaan, balse arrintani waxa ay sidoo kale hoos u dhigaysaa sharciyadda hay'adaha dawladeed. Isticmaalka maxkamadahan waxaa sii kordhiyay aragtiyo iyo cabashooyin la xiriira eex, iyada oo dad badan ay u arkaan in hay'adaha dawladdu ay u janjeeraan beelaha awoodda leh, taas oo hoos u dhigta kalsoonida iyo in beeluhu si niyadsan uga qayb noqdaan maamul gobolkeedka.[25]

22. Focus Group Discussion – Elders (Bula Burte).
23. SPA and SDP brief, Focus Group Discussion (Cadale).
24. Berghof Foundation, (2023). Conflict Transformation and Reconciliation in Somalia:  Lessons for Local Peacebuilding. Accessed at: www.berghof-foundation.org
25. Horn Observer. (2024). Eight Years of Hirshabelle: Celebrations Amid Stagnation in Security, Reconciliation, and Humanitarian Crisis. Accessed at: www.hornobserver.com

Tartanka kheyraadka ayaa kaalin weyn ka ciyaara colaadaha ka jira gobolka, gaar ahaan marka la eego dhulka carrada dihin leh iyo biyaha ku teedsan webiga Shabeelle. Musiibooyinka dabiiciga ah, sida fatahaadaha soo noqnoqda iyo abaaraha ayaa sii xoojiya tartanka u dhexeeya beelaha, isla markaana huriya xiisado la xiriira in kheyraadka lagu loolamo.[26]

Kooxaha xagjirka ah sida Al-Shabaab ayaa mararka qaar ka faa'iideysta kala qaybsanaanta qabiillada, taas oo hoos u dhigaysa sharciyadda dowlad goboleedka iyo dadaallada lagu doonayo sugidda amniga iyo dimuqraadiyeynta. Joogitaanka kooxahan ayaa adkeynaya geeddi socodka xasillinta, isla markaana caqabad ku noqda helitaanka dawladnimo macno leh.[27]

Maqnaanshaha dib u heshiisiin dhab ah oo u dhexeysa qabiilada iyo dedaallada dhexdhexaadinta ee lagu doonayo in lagu soo dhiraandhiriyo dib u heshiisiin dhab ah ayaa u eg kuwo aan joogto ahayn isla markaana la siyaasadeeyay. [28] Tusaale ahaan, hababka dhexdhexaadinta oo dhinac u janjeera, badanaa waxa ay ka tarjumaan dano beeleed ama shaqsiyeed halkii ay ka noqon lahaayeen kuwo diiradda saaraya oo beegsanaya helidda xalal waaraya. Intaa waxaa dheer, dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee heer Qaran ayaa mararka qaar sii hurinaya khilaafaadka heer deegaan, taas oo caqabad ku noqota dhismaha jawi siyaasadeed oo mideysan misna xasilloonnaada.[29]

Sinnaan la'aanta dhaqaale iyo isu dheellitir la'aanta awoodda ayaa sidoo kale caqabad ku ah midnimada, bulshooyinka la haybsooco waxa ay muujiyaan tabashooyin ka dhasha qaybsiga kheyraadka taas oo aan caddaalad ahayn, halka beelaha awoodda leh ay diidaan in lagu sameeyo dib u qaabayn kasta oo wax ka dhimi karta saameyntooda.

Saameynta kala qaybsanaantani ay ku leedahay sharciyadda dowlad goboleedka waa mid qotodheer. Hababka dawladnimo ee kala gurka iyo ka qaybgelin la'aanta ku dhisani waxa ay hoos u dhigeen kalsoonida dadweynaha, iyaga oo abuuray aragti ah in dawladdu u adeegto beelo gaar ah, badalkii ay ka ahaan lahayd hay'ad dhexdhexaad ah oo matasha dhammaan muwaadiniinteeda. Tani waxa ay keentay hoos u dhac amni, maadaama khilaafaadka beelaha ee aan la xallinin fursad siiyeen kooxaha xagjirka ah sida Al-Shabaab kuwaas oo ka faa'ideysta daldaloollada jira.[30] Saameynta dhaqaale iyo midda bulsho ayaa lafteedu aad u culus. Colaadaha soo noqnoqda waxa ay carqaladeeyaan tacbashada beeraha, ganacsiga, iyo waxbarashada, taas oo sii kordhisa saboolnimada iyo barakaca. Masiibooyinka deegaanka, sida fatahaadaha, ayaa iyaguna sii xoojiya dhibaatooyinka bulshada iyo dhaqaalaha. [31]

26. Focus Group Discussion – Elders (Bula Burte).
27. Ibid.
28. Berghof Foundation, (2023). Conflict Transformation and Reconciliation in Somalia: Lessons for Local Peacebuilding. Accessed at: www.berghof-foundation.org
29. Horn Observer. (2024). Eight Years of Hirshabelle: Celebrations Amid Stagnation in Security, Reconciliation, and Humanitarian Crisis. Accessed at: www.hornobserver.com
30. Focus Group Discussion, Elders (Beledweyne).
31. Ibid.

Si wax looga qabto caqabadaha isku murugsan, waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo qiimeyn iyo dib u habayn ballaaran. Marka hore, qiimeynta doorarka ururrada heer bulsho ee ka qaybgalkoodu macno u leeyahay dib u heshiisiinta waa muhiim. Sidoo kale, suurtagalnimada in la dhiso guddiyo nabadeed oo heer deegaan ah kuwaas oo la shaqaynaya hay'adaha dawladda ayna ku jiraan xubno ka socda dhammaan beelaha ayaa kaalin weyn ka qaadan kara dhexdhexaadinta khilaafaadka, iyada oo aan cid gaar loo xaglineyn.  Intaa waxaa dheer, ka faa'iidaysiga odayaasha dhaqanka si ay u fududeeyaan wadahadallada waxna ka qabtaan tabashooyinka taariikhiga ah waxay' ay gacan ka geysan kartaa in la hagaajiyo xiriirka beelaha.

Xoojinta dawladnimada ayaa iyana ah lama huraan, taas oo u baahan matalaad loo dhan yahay oo ka jirta hay'adaha dowlad goboleedka si loo dhiso kalsooni, korna loogu qaado awoodda dowlad goboleedka iyada oo loo marayo taageero iyo farsamo ilaa heer federaal ah.

Wax ka qabashada khilaafaadka ku salaysan kheyraadka waa mid muhiim u ah xasilloonida. Sameynta qaabab cadaalad ah oo lagu qaybsado kheyraadka waxa ay hoos u dhigi karaan tartanka u dhexeeya qabiillada iyo daneeyeyaasha kale, halka ay soo jiidasho ku samayn karto maalgashiga mashaariic horumarineed oo waari kara, sida maaraynta fatahaadaha iyo nidaamyada waraabka ay muhiim u yihiin xasilloonida mustaqbalka fog ee maamulk goboleedka.

Ugu dambayn, si loola dagaalamo xagjirnimada waxaa loo baahanyahay in la xoojiyo amniga, taas oo keeni karta in ay dib u dhisto kalsoonida ciidamada dawlad goboleedka iyo in la abuuro barnaamijyo diiradda saaraya ka hortagga xagjirnimada sidoo kalena hagi kara wacyiga bulshada.

Gabagabadii, caqabadaha horyaalla Hirshabeelle, gaar ahaan kuwa la xiriira kala qaybsanaanta qabiillada iyo kala qoqobsanaanta siyaasadeed waxa ay khatar ku yihiin awooda Hirshabeelle iyo in ay noqoto dowlad goboleed xasilloon. Wax ka qabashada arrimahan waxa ay u baahanyihiiin hannaan isku dhafan oo heerar badan leh, kaas oo diiradda saaraya dibu heshiin, dawladnimo loo dhanyahay iyo maarayn wax ku ool ah oo kheyraadka la xiriirta. Haddii aan si joogto ah loogu dadaalin arrimahan, Hirshabeelle waxa ay halis ugu jirtaa in ay sii ahaato mid nugul oo karaan yar, taasina waxa ay dhaawac u geysanaysaa geeddisocodka federaalaynta Soomaaliya.

## 4.2 Saameynta Kala qaybsanaanta Bulshadu ay ku leedahay Dawladnnimada

Hirshabeelle waxa ay wajahaysaa caqabado sidii oodo dhacmeed isu dulsaaran, kuwaas oo si weyn u saameeyay dawladnimada, jawiga siyaasadda iyo midka bulshada ee dowlad goboleedka. Daldaloollada joogtada ah ee qaab dhismeedka dawladnimada ayaa wiiqaya kalsoonida dadweynaha iyo hufnaanta shaqada maamulka, taas oo keentay hoos u dhac ku yimaadda tayada adeegyada dadweynaha iyo kalsoonida lagu qabo nidaamyada sharci ee jira. Arrimahan oo isku xiran, waxa ay abuureen karaan yari iyo in shaqooyinka asaasiga ah ee dawladdu sidii larabay u socon waayaan. Kala qaybsanaanta beelaha ee aadka u xooggan iyo loollanka u dhexeeya kooxaha hoggaamiyeyaasha ah ayaa dhalisay darreen ah in beelaha qaar ee muhiimka u ah dhismaha dowlad goboleedku ay dareemaan haybsooc ku aaddan ka qaybgalka siyaasadda.[32]

Iyada oo aanuu jirin hannaan cad oo wax looga qabanayo tabashooyinkan iskugu jira, xasillooni darrada iyo kala daadsanaanta siyaasadeed, Kuwaas oo caqabad ku noqday abuuridda jawi wada shaqayn oo dhexmarta beelaaha, maadaama danaha beeluhu ay siyaasadda hagaan. Natiijaduna waxa ay noqtay in go'aamada maamulku ay hanqaadi waayaan.

Daciifnimada hay'adaha dawladeed waxa ay si toos ah u wiiqeen kalsoonida dadweynaha ee hab maamulka dawladda. Dhanka kale, marka hay'adaha muhiimka ah sida garsoorka, fulinta iyo maamulka heer deegaan aanay si quman u shaqayn, bulshadu waxa ay bilowdaa in ay si dhab ah uga shakido kartida dawladdu u sii lahaan karto bixinta adeegyada aasaasiga ah iyo sugidda amniga.[33] Kalsooni darradani waxa ay sidoo kale marmarka qaar carqaladeysaa daadejinta adeegyada, maadaama khilaafaadka siyaasadeed ay hoggaankii ka jeediyeen kaabayaasha muhiimka ah sida, caafimaadka, waxbarashada, iyo kuwa dhaqaalaha. Maamul xumo iyo isku xirnaan la'aan ka dhex jirta hay'adaha ayaa sii xoojinnaya sinnaan la'aanta, taas oo si gaar ah u saameysa bulshada qaybeheeda nugul.[34] Isku soo xoori oo, natiijadu waa kala qaarnaan sii kordhaysa oo ka dhex aloosan dawladda iyo bulshada, dalow dheerna ka shalwinaysa in xasiloonidii mar kale dib loo soo dabbaalo.

Wax ka qabasho la'aanta arrimahani waxa ay leeyihiin cawaaqib amni oo halis gelin kara maamulka, dhanka kale khilaafaadka u dhexeeya siyaasiyiinta ayaa inta badan ka dhasha malleeshiyaad beeleedyo abaabulan oo la kala safan siyaasiyiinta, taasina waxa ay uga sii daraysaa xaaladda Hirshabeelle oo awalba banyaal ahayd.

---

32. Horn Observer. (2024). Eight Years of Hirshabelle: Celebrations Amid Stagnation in Security, Reconciliation, and Humanitarian Crisis. Accessed at: www.hornobserver.com
33. Focus Group Discussion – Elders (Bula Burte).
34. Kaplan, S. (2019). Fixing fragile states. Praeger Security International.

Haddii aan arrimahan wax laga qabanna way is biirsanayaan ilaa ay gaaraan heer aan waxba laga qaban karin. Tabashooyinkani waxa ay raad muuqda ku leeyihiin isdhexgalka siyaasadeed ee Hirshaabeelle. Waana tabashooyin soo taxnaa tan iyo alkumiddii Hirshabeelle oo saameyn taban ku yeelan kara gaarista heshiisyo nabadeed oo waari kara.[35]

Intaa waxaa dheer, in khilaafyadaa dabada dheeraaday ay Al-shabaab iyo beelo kale oo isku haya ceshiimooyin, kuna taratamaya khayraadka beeraha iyo waraabka ay si joogto ah uga faa'iidaystaan. Dhanka kale, inta badan jilayaasha carqaladeeya geeddi socodka siyaasadeed ee nabdooni waxa ay adeegsadaan maleeshiyaad si ay u gaaraan danahooda, taas oo sii kordhisa kalsooni darrada, isla markaana daciifisa hay'adaha dawladeed.[36] Arrintani waxa ay sidoo kale wiiqdaa u hoggaansanaanta sharciga, waxayna dhaawacdaa sharciyadda hay'adaha maamulka, iyadoo hurinaysa qalalaase dawladnimada ka dhan ah oo ballaaran. Xasillooni darradani waxay sidoo kale saameyn toos ah ku leedahay dhaqaalaha, iyadoo hoos u dhigaysa maalgashiga shisheeye sababo la xiriira khataraha iyo hubanti la'aanta siyaasadeed ee Hirshabeelle hadheeyay. [37]

Xasillooni darrida ka jirta gobolka waxa ay uga sii dartay hay'adahii dawladeed oo markooda horeba iska tabar yaraa, waxaana ay la tacaalayaan bixinta adeegyada aasaasiga ah, sugidda sharciga iyo taabogelinta amniga iyaga oo haysta khayraad aad u xaddidan oo ay ku hareeraysan yihiin khilaafaad siyaasadeed.[38] Arinkanna waxa uu markasta sii kordhinayaa ku tiirsanaanta iyo isku halleynta ay bulshadu isku halleynayso taageerada iyo difaaca beelohooda. Dhanka kale, bulshada waxaa soo foodsaaray walaacyo iyo niyadjab xooggan oo ay ka qabaan dawladnnimada fadhiidka ah. Arrimahani waxa ay ka marag kacayaan in Hirshabeelle ay u baahantahay abuuridda madal dhexdhexaad ah oo yareyn karta kala baahsanaanta bulshada. Taana waxa lagu hirgelin kara in la sameeyo istiraatiijiyad[39] dhammeystiran oo dhisaysa kalsooni u dhexeysa hoggaamiyeyaasha siyaasadeed, odayaasha dhaqanka, iyo bulshada inteeda kale. Arintan waxa ay kor u qaadi kartaa helidda horumar siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo ay bulshadu iska wada dhex arki karto.

Xoojinta hay'adaha si loo kordhiyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka waa tiir muhiim u ah bixinta adeegyo waxtar leh sida waxbarashada, caafimaadka, iyo kaabayaasha dhaqaalaha[40] , isla markaana waxa ay qayb wax ku ool ah ka qaadan karaan hoos u dhigida darreenka haybsooca iyo ka qaybgelin la'aanta ee ay bulshadu tabanayso. Haddii aan la qaadin tallaabooyinkan, oo aan hay'adaha dib u habeyn lagu sameeyn, way adkaan doontaa in la gaaro dawladnimo wanaagsan.[41]

35. Focus Group Discussion - Community Members (Beledweyne).
36. UNDP (2021). State-building in fragile contexts. United Nations Development Programme.
37. Focus Group Discussion – Community Members (Bula Burte).
38. (World Bank, 2023).
39. World Bank, (2023). Somalia Economic Update 2023. World Bank Group.
40. Ahmed, I. (2020). Political mistrust and governance challenges in Somalia. Mogadishu University.
41. UNDP, (2021). State-building in fragile contexts. United Nations Development Programme.

Tallaabooyinkaasna waa in lagu lammaaniyaa dedaallo ay hormuud ka yihiin bulshadu, badanaa dedaallada ay fuliyaan ururrada maxalliga ah, waxa ay kor u qaadi karaan ka qaybgalka dadweynaha iyo ka jawaabidda baahiyaha dhabta ah ee bulshada, taas oo gacan ka geysan karta dib u alkumidda kalsoonida dawladnnimo.

Baahida degdegga ah ee loo qabo xoojinta wadahadal siyaasadeed oo loo dhan yahay iyo dib u heshiisiin dhab ah waa arrin lama huraan ah oo muddo dheer dib u dhacaysay, isla markaana muhiim u ah dib-u-dhiska Soomaaliya. Hannaannadan kuma koobna oo keliya fududeynta isgaarsiinta, balse waxa ay abuuraan fursado lagu gaari karo go'aanno wadajir ah, taas oo saldhig u ah sii jiritaanka qaab-dhismeedka dawladnimo ee muddada fog. Dhanka kale, Adkaynta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka waxa ay yareyn karaan musuqmaasuqa iyo khataraha colaadeed, isla markaana waxa ay kor u qaadi karaan kalsoonida dadweynaha. Waxay nidaamyada federaalka ee isku dheelli-tira danaha beelaha muujiyeen in ay leeyihiin awood ay ku yarayn karaan colaadaha isla markaana ku dhiirrigeliyaan wadaag dawladnimo.[42] Sidaas darteed, hirgelinta maamul loo dhan yahay oo aqoonsan danaha wadajirka ah tiir muhiim u ah xoojinta isku duubnida bulshada iyo xasilloonida guud.

Caddaymo jira ayaa muujinaya in nidaam federaal ah oo si dhab iskugu dheelli-tira danaha beelaha uu keeni karo natiijooyin wax ku ool ah, gaar ahaan marka la eego yaraynta colaadaha iyo dhisidda darreen wada lahaansho dawladeed.[43] Taasi waxay muujinaysaa in loo baahan yahay hannaan maamul oo aqoonsan danta guud tixgelinna siiya, taas oo sahlaysa in la dhiso bulsho isku-duuban oo haysta xasillooni joogto ah. Waxa intaa dheer, in dib u habeyn iyo xirfadeyn lagu sameeyo hay'adaha amniga ay muhiim u tahay xaqiijinta xasilloonida. Tani waxay u baahan tahay qiimeyn guud iyo isbeddel dhismeed oo ka dhiga hay'adaha amniga kuwo si qumman u shaqayn kara, isla markaana soo celiya kalsoonidii wiiqmatay ee hay'adaha dawladeed.

Dib u habeynta amnigu waxa kale oo ay muhiim u tahay in laga hortago ku takrifalka awoodda, gaar ahaan marka ay awooddu ku salaysan tahay nidaamka beelaysiga. Waxa kale oo lagama maarmaan ah in la dhiso nidaam amni oo dhexdhexaad ah, xirfad leh, kana madax bannaan siyaasadda iyo beelaha si loo hubiyo fulin sharci oo caddaalad ah. Tallaabadani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay xaaladaha siyaasadeed ee dalku ku jiro oo ah kuwo abuuray nugayl.[44] Haddaba, wax ka qabashada arrimahan isku-dhafan ee aan soo tibaaxnay waxay u baahan tahay dedaal dhab ah oo laga mideysan yahay, si dib loogu dhiso kalsoonida, loona dhiirrigeliyo ka qaybgal ballaaran oo dhammaan dhinacyada kala duwan ee bulshada ka yimaadda. Taasina waxay horseedi kartaa helitaanka maamul ku dhisan daahfurnaan, isla xisaabtan, iyo sarreyta sharciga iyo fulintiisa.[45]

42. Kaplan, S. (2019). Fixing fragile states. Praeger Security International.
43. Braldbury, M. (2008). Becoming Somaliland. James Currey.
44. Transparency International, (2022). Corruption Perceptions Index 2022. Transparency International.
45. International Crisis Group, (2018). Somalia: Transforming clan dynamics. ICG Reports.

Marka la soo koobo, Hirshabeelle waxa ay wajahaysaa kalsooni-darro bulsho iyo mid siyaasadeed oo si baaxad leh u baahday, iyo khilaafyo xallintooda marar badan la sakraday oo dabo dheeraaday. Caqabadahani waxa ay si isku mid ah u saameeyeen heerarka kala duwan ee dawladnnimada sida, fulinta, sharci dejinta, iyo bulshada lafteeda, taas oo caqabad weyn ku noqotay hirgelinta maamul wax ku ool ah. Natiijadu waxa ay noqotay in daldaloollada dawladnnimo ay sii qotodheeraadan isla markaana ay bataan arrimo xasiloonida lidi ku ah sida, kala furfurka bulshada, colaadaha, iyo caqabado dhaqaale.

Waxaan la diidi Karin in Hirshabeelle ay Maamul-goboleedyada kale kala mid tahay arrimaha qaar sida maqnaanshaha siyaasad loo dhan yahay oo dhammaan bulshada degaamada deggan lagaga qeybgelinayo siyaasadda iyo arrimaha masiiriga ah, khilaafyada ku aaddan arrimaha khayraadka, loolanka beelaha iyo is-kooxaysiga ku dhisan danaha. Haddaba arrimahani waxay inta badan fursad u abuuraan jilayaasha aan dawliga ahayn ee aan tabashooyinkooda la xallin si ay uga faa'ideystaan maamulka culeysada la daalaa-dhacaya. Arrintaa daraadeed, xasilloonida guud ee nidaamka federaalku waxa ay u baahan tahay hoggaan firfircoon iyo in DFS ay abuurto wada-shaqayn lagu hergelinayo isku-keenista bulshada marka arrimuhu is-goys masiiri ah sidan oo kale taagan yihiin.

Isku soo xoori oo, waxaa lagama maarmaan ah in dhammaan heerarka dawladdu hormuud ka noqdaan xoojinta isku-duubnida, dib-u-heshiisiinta, iyo u qaybsiga khayraadka hab caddaalad ah. Wada shaqaynna lala yeesho daneeyayaal kala duwan oo ay ku jiraan siyaasiyiin, bulshada rayidka, iyo saaxiibada caalamka, taas ayaa muhiim u ah dhisidda kalsooni iyo horumarinta hab-maamul  u adeegaya danaha bulshada guud ahaan. Dedaallada wadajirka ah ayaa fure u ah wax-ka-qabashada sababaha asaasiga ah ee kalsooni darrada abuuray, isla markaana gacan ka geysan kara abuuridda jawi bulsho iyo siyaasadeed oo xasiloon caddaaladna ah. Haddaba, haddii la xoojinayo wadashaqaynta, daneeyeyaashu waxay si wax ku ool ah uga hortagi karaan caqabadaha ka dhasha kala-qaybsanaanta beelaha iyo tartanka kheyraadka, taas oo ugu dambayn xoojinaysa maamul iyo xasilloonida Hirshabeelle iyo dawlad-goboleedyada kaleba.

# 4.3 Doorka Hormuudka iyo Loollanka Awoodda

Doorka kooxaha hormuudka siyaasadda ah ee ku lug leh gorgortanka awoodda iyo qaybsiga kheyraadka waa arrin muhiim ah oo si weyn u qaabeysa xasilloonida siyaasadeed ee Hirshabeelle iyo guud ahaanba Soomaaliya. Inkasta oo gorgortanka eliidku uu ka jiro nidaamyo siyaasadeed oo kala duwan, haddana nooca iyo sharciyadda daneeyeyaasha siyaasadeed way kala duwanaan karaan. Dalalka dimuqraadiga ah badankoodu wakiillada degmooyinka, gobollada, iyo dawlad-goboleedyada waxa la xisaabtama bulshooyinka ay matalaan, iyaga oo sharciyad ka helaya doorashooyin toos ah, isla markaana waxa lagu kormeeraa doorashooyin xilliyeed. Balse Soomaaliya, kooxaha hormuudka siyaasadda u ahi waxay saameyntooda ka helaan xiriirro ku dhisan dano is-weydaarsi oo ka dhex jira waxa loo yaqaan "Saylado Siyaasadeed" waa nidaam ay si aan rasmi ahayn ugu kala iibsadaan taageerada siyaasadeed, saameynta, iyo helitaanka kheyraadka, badalkii halkii taageerada ama arrimaha kaleba ku kasban lahaayeen hab dimuqraadi ah oo daahfuran isla-xisaabtanna leh.

Isku-darka nidaamka federaalka iyo hannaanka saami-qaybsiga ee 4.5 wuxuu abuuray dhaqan ah in isla-xisaabtanku noqdo qaab kor-kaga-keen ah, taas oo micnaheedu yahay in matalaadda lagu go'aamiyo heer hoggaamineed halkii ay ka ahaan lahayd mid ka timaadda bulshada qaybaheeda kala duwan. Waxay tani caddeynaysaa jiritaanka aragtidii aan kor ku xusnay ee ahayd in siyaasadda lafteedu leedahay saylado lagu baayactamo. Haddaba, doorka hormuudka siyaasadda ee Soomaaliya waxaa si weyn loogu arkaa mid ilaalinaya ama sii wadaya danaha dawlad-goboleedyada, ganacsatada, iyo hogaamiyeyaasha beelaha, kuwaas oo ay hormuudku la xisaabtamaan isla markaana ay ka tarjumaan heerka qanacsanaantooda ama cabashadooda.[46]

Sababahaan awgood, qaabka uu u dhacay qaybsiga kheyraadka iyo awooddu oo markii hore la rabay inuu taageero nidaam ka madax bannaan danaha siyaasadeed ayaa taas beddelkeeda sii xoojiyay qaab-dhismeedka beelaha ee ku salaysan abtirsiinta, halkii uu ka dhiirrigelin lahaa hoggaan masuul ah[47] iyo isla-xisaabtan. Arrintan, oo loo yaqaan "Gorgortanka Hormuudka" (elite bargain), wuxuuna hannaankani beddelay dhammaan nidaamyadii kale oo waxa uu noqday hab siyaasadeed qaabeeya natiijooyinka, isla markaana muhiimad gaara u yeesha kooxaha hormuudka siyaasadda ah.  Natiijada ka dhalatay arrintaas darteed ballaarinta saaxadda siyaasadeed iyo dib-u-habaynta qaab-dhismeedka maamulku waxay weli wajahayaan caqabado maadaama nidaamka hadda jira uusan sinnaba u dhiirrigelin isla-xisaabtan isla markaana uusan kobcinayn tartan siyaasadeed oo daahfuran kana madax bannaan is-kooxaysi.

46. Organisation for Economic Co-operation and Development, (2020).
47. Transparency International, (2022). Corruption Perceptions Index 2022. Transparency International.

Caadi ahaan kooxaha hormuudka ahi waxay door weyn ka ciyaaraan xalinta khilaafaadka, bixinta kheyraadka, dejinta sharciyada, iyo waajibaadyo kale oo muhiim ah. Balse siyaasadeenna xiriirada kooxahaasi waxay inta badan ku dhisan yihiin dano is-weydaarsi, waxaana ku gedaaman oo hareeyay eedaymo musuqmaasuq oo loo jeedinayo, maadaama isla-xisaabtanka oo ah tiirka ugu muhiimsan ee maamulka uusan si buuxda uga mid noqon hab-dhaqannada siyaasadeed.[48] Sidaas darteed, marka la eego Hirshabeelle, hoggaamiyeyaasha waxay door muhiim ah ka ciyaari karaan xalinta tabashooyinka bulshada, balse sida ay u adeegsadaan saameyntooda waa mid aan qaadhaan ku darsaneyn geeddi-socodka, waxaana inta badan caqabad ku noqda rabitaankooda siyaasadeed oo xaddidan oo saameyn ku yeeshay badi heerarka kala duwan ee dawladnimada. Arrintani waxay xitaa noqon kartaa mid is-burinaysa marka dano la xiriira awoodda iyo kheyraadku ay is khilaafaan.[49]

Gebagadii, kooxaha hormuudka siyaasadda ahi mararka qaar haddii ay saameeyaan ama muujiyaan ficillo u adeegaya danaha qaranka, waa mid la yaab ku noqota daneeyeyaasha kale, sababta oo ah ma aha wax looga bartay oo waa dhif iyo naadir in la arko iyagoo isku hawlaya danaha guud. Dhacdooyinkii hore ee taariikhda u galay ayaana saameyn ku leh soo celinta kalsoonidii luntay, weliba haddii ay jiraan tuhunno musuq la xiriira, taasi waxay ceel dheer kusii riddaa in la aamino xitaa marka doonistoodu danta guud tahay.

# 5. Caqabadaha Midnimada iyo Xasilloonida

## 5.1 Kala-qaybsanaanta Beelaha iyo Kala-daadsanaanta Siyaasadeed

Khilaafaadka u dhexeeya beelaha Soomaaliyeeed waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee wiiqa nabadda iyo horumarka.[50] Maqnaanshaha nidaam garsoor oo si buuxda u shaqeeya, dib-u-habayn aan caddaalad ahayn oo dhulka ah iyo sharci aan si dhab ah loo dhaqan gelin ayaa sii xoojiya khilaafaad soo noqnoqda. Inkasta oo hababka dhaqanka ee dib-u-heshiisiintu ay door muhiim ah ka ciyaaraan xalinta khilaafaadka, haddana waxay inta badan mudnaanta siiyaan isla-xisaabtan beeleed oo guud, halkii ay ka saari lahaayeen masuuliyadda shakhsiga, taas oo wiiqaysa fulinta sharciga iyo cidda dhabta ee dhibta dhacday loo xambaarin lahaa.

48. Key Informant Interview, Government official (Hiiraan).
49. Elite Bargains and Political Deals projects: Somalia Case Study 201. Accessed at: https://assets.publishing.service.gov.uk/media/5c191358ed915d0c3d63f6ab/Somalia_case_study.pdf
50. Key Informant interview, Government Official (Hiiraan).

Hababkan ayaa badanaa xoojiya isku-xirnaanta bulshada ee ku dhisan beelaha, iyaga oo aan si dhab ah u taaban sababaha asaasiga ah ee khilaafaadka keena, taas oo u oggolaanaysa in khilaafaadku mar kale soo noqdaan. Marka qaab-dhismeedyadan loo raro goobta siyaasadda oo laga dhaqan geliyo, waxay ku riixaan hormuudka iyo odayaasha inay diiradda saaraan xabbad-joojin ku-meelgaar ah, halkii laga heli lahaa xal waara. Sidoo kale, maqnaanshaha hay'ado rasmi ah oo go'aan kama dambays ah gaari kara ayaa ka dhigaya heshiisyadan kuwo aan la dhaqan gelin karin, taas oo xaqiijinaysa in khilaafaadkani dib u soo noqon karaan.

## 5.2 Arrimaha Amniga ee La Xiriira Caqabadaha Maamulka

Doorka Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubeysan ee aan dowliga ahayn ee rabshadaha wata ee sii hurinaya xasillooni-darrada siyaasadeed lama dhayalsan karo, iyada oo warbixinno badan ay muujinayaan xiriir ka dhexeeya tabashooyinka beelaha, xasillooni-darrada siyaasadeed, iyo kororka dhaqdhaqaaqa kooxahan.[51] Jilayaashani waxay ka faa'iidaystaan tabashooyinka beelaha iyo nuglaanta jirta si ay isugu muujiyaan in ay  beddel u yihiin dawladnimada, iyaga oo ka faa'iidaysanaya fashilka dawladda ee bixinta adeegyada, xaqiijinta isla-xisaabtanka, iyo xalinta khilaafaadka dabada dheeraaday.

Khilaafaadkani waxay salka ku hayaan tabashooyin qotodheer oo soo jireen ah oo la xiriira dagaalkii sokeeye iyo burburkii dawladnnimada Soomaaliya. Inkasta oo dib-u-dhiskii kadib xoogga la  saaray sugidda amniga magaalooyinka, haddana dedaalladaas kaligood kuma filna haddii aan lagu lammaanin wax ka qabashada musuqmaasuqa nidaamsan, awood yarida hay'adaha, iyo baahiyaha bulshada oo ah arrimo weli wiiqaya sharciyadda dawladnimada isla markaana sii hurinaya xasillooni-darro.[52] Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee xagjirka ah waxay si firfircoon uga faa'iidaystaan dulduleelladaan, iyaga oo is-dhex gelinaya nidaamkaas, isla markaana si xoog ah shacabka dhaqaale uga uruursanaya, taas oo sii xoojisa in rabshadu meerto noqdaan. Arrintaasina waxay hoos u dhigtaa awoodda dawladda ee ku aaddan in diiradda la saaro dhismaha dawladnnimada, maadaama hadda inta ugu badan xoogga la saaro arrimaha amniga oo keliya arrimaha Kalena la il-duufay.[53]

51. Key Informant Interview – Somali Politician (Hirshabelle).
52. Ibid.
53. As African Union Mission in Somalia Draws Down, Al-Shabaab Remains Threat to Country, Region, Special Representative Tells Security Council. Accessed at: https://press.un.org/en/2023/sc15457.doc.htm.

## 5.3 Kalsooni-darrada Bulshada iyo God-daloolooyinka Maamulka

Xasillooni-darrada joogtada ahi waxay ka dhalataa isku-darka fashilka hay'adaha ee heerarka kala duwan iyo hoos-u-dhaca sharciyadda ay bulshada u qabto cutubyada siyaasadeed. Tobannaan sanno oo colaado ah ayaa kala furfuray isku-xirnaanta bulshada, halka nidaamka 4.5 ee saami-qaybsigu oo markii hore loo hirgeliyay si wax loogaga qabto haybsoocii taariikhiga ahaa, balse uusan muddo ka badan 20 sanno ah ku guulaysan xal u helidda iyo maareynta arrintan.

Falanqaynta daneeyeyaasha ayaa muujisay jiritaanka shabakado dano gaar ah ku dhisan iyo maamul aan wax ku ool ahayn, taas oo wiiqaysa hadafkii nidaamku lahaa ee ka-qaybgelinka qaybaha kala duwan ee bulshada, isla markaana sii hurinaysa khilaafaadka ku salaysan tabashooyinka[54]. Heerarka kalsooni darrada ayaa si qoto dheer u xididaystay, maadaama maamulka uu inta badan ku mashquulsan yahay yoolal muddo gaaban ah oo lagu ilaaliyo wax u eg shaqayn, halkii uu diiradda saari lahaa isbeddel waara. Xaaladdani waxay ku baahsan tahay badi heerarka dawlad-goboleedyada, halkaas oo siyaasadda ku dhisan is-aqoonsiga (identity politics) ay xooggan tahay, isla markaana qaybsiga kheyraadka loo arko mid u janjeera dhinacyada galaangalka la leh nidaamka siyaasadeed.[55] Marka la eego kalsooni darrada u dhexeysa heer qaran iyo heer dawlad-goboleed, xaaladdu waa la mid, taas oo sii adkaynaysa fahamka guud ee ku saabsan sida dawlad-goboleedyadu markii hore loo dhisay.[56]

# 6. Gunaanad

Dhismaha Hirshabeelle waxa uu tusaale cad u yahay caqabadaha ku xeeran geeddi-socodka federaalaynta Soomaaliya, oo ay ka mid yihiin wada-tashi degdeg ku jiro, hannaan awood-qaybsi oo muran badan dhaliyay, iyo tabashooyin beeleed oo aan weli la xallin. Inkasta oo isu-geynta gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe loogu talogalay in lagu horumariyo maamul daadejin haddana waxay keentay kala-daadsanaan siyaasadeed oo sii xoogaysatay. Beelaha awoodda leh Xawaadle iyo Abgaal inkasta oo ay wadajir ahaan haystaan wax ka yar 30% kuraasta baarlamaanka, haddana waxay saameyn aan isu dheellitirneyn ku leeyihiin maamulka, iyagoo gacanta ku haya jagooyinka fulinta iyo maleeshiyaad beleedyo, taas oo horseedday in beelaha kale ee deggan Hirshabeelle la hareer mariyo talada iyo nafcigaba.

54. Focus Group Discussions, Elders (Buloburte).
55. Key Informant Interview, Somali Politician (Hiiraan).
56. Key Informant Interview, Somali Politician (Hirshabelle).

Arrimaha amniga saameynta ku leh sida joogitaanka Al-Shabaab iyo tartanka ku aaddan sameynta isbaarooyin loo dhigto ilaha dakhliga laga helo ayaa sii xoojinaya awood yarida maamulka isla markaana hurinaya xasillooni-darro. Sidoo kale, dastuurka kumeelgaarka ah ee si degdega ah loo ansixiyay, bulshada oo dhan aan laga qaygelin ayaa saameyn ku yeeshay sharciyadda dawlad-goboleedka.

Is-dhexgalka siyaasadda hormuudku hoggaaminayo, saameynta Dawladda Federaalka, iyo tabashooyinka taariikhiga ah ayaa si wadajir ah u wiiqay xasilloonida Hirshabeelle, iyagoo sii xoojinaya kalsooni-darrada isla markaana mudnaanta siinaya dano ku dhisan is-weydaarsi halkii mudnaanta laga siin lahaa isla-xisaabtan dadweyne. Dhanka kale, Arrimaha muhiimka ah ee maamulka sida, qaybsiga caddaaladda ah ee kheyraadka, dib-u-heshiisiinta, iyo dib-u-habaynta hay'adaha weli si dhab ah looguma kuur-gelin, taas oo uga sii daraysa nuglaanta iyo xasillooni darradii horeba u jirtey. ugu dambayntii, soo bixitaanka maamul barbar socda kan hadda jira oo lagaga dhawaaqay Beledweyne ayaa sii xumeysay xaaladda maamulka iyo amniga, taas oo ugu dambayntii abuuraysa firaaqo awood iyo hoos u dhac ku yimaadda xaaladaha nololeed ee bulshada. Qaab-dhismeedyadan isku dhafan waxay u baahan yihiin faragelin degdeg ah si loo yareeyo kala-qaybsanaanta siyaasadeed, dibna loogu soo celiyo sharciyaddii maamulka, loona xoojiyo amniga. Waxaana lama huraan ah hirgelinta hab dhammaystiran oo mudnaanta siinaya dib-u-heshiisiin, maamul loo dhan yahay, iyo dib-u-habaynta hay'adaha. Taas ayaa horseed u noqon karta soo celinta xasilloonidii iyo horumar waara oo ka hanaqaada Hirshabeelle.

# 7. Tallooyin Siyaasadeed

Si loo dhiso maamul loo dhan yahay, xasilloon, isla markaana wax ku ool ah oo ka hanaqaada Hirshabeelle, waxay HIPS soo jeedinaysa in la qaado tallaabooyinkan soo socda:

1. **Dib-u-habaynta Dastuurka iyo Maamulka:** Xasilloonida siyaasadeed ee Hirshabeelle waxay u baahan tahay in si dhab ah wax looga qabto khilaafaadka muddada dheer taagan ee ku saabsan qaab-dhismeedka maamulka, awood-qaybsiga, iyo caasimadda dawlad-goboleedka. Dawladda Federaalka waa inay bilowdaa dib-u-eegis ballaaran oo lagu sameeyo qaab-dhismeedka dastuuriga ah si loo hubiyo saami-qaybsi caddaalad ah, loona yareeyo ku takrifalka siyaasadeed. Sidoo kale, waa in la xaqiijiyaa matalaad dheellitiran oo ku saleysan xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan tirada bulshada labada gobol. Daahfurnaanta iyo hubinta in beelaha la haybsooco ay nidaamka ka mid noqdaan waxay lagama maarmaan u tahay xoojinta kalsoonidda iyo sharciyadda maamulka.

2. **Wadahadal Loo-dhanyahay oo Daneeyayaal Badan laga qaybgeliyo:** Dawladda Federaalka waa inay abaabushaa wadahadal ballaaran oo ay ka qayb qaataan daneeyayaal kala duwan si loo xalliyo khilaafaadka awood-qaybsiga iyo arrinta caasimadda. Wadahadalkaasna waa in ay ku lug yeeshaan beelaha muhiimka ah ee ku dhaqan Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe, sida culimada, hormuudka siyaasadda heer gobol iyo heer qaran, iyo bulshada rayidka ah. Waxa kale oo muhiim ah in la helo dhinac saddexaad oo aan cid gaar ah u xaglineyn gacanna ka geysan kara xaqiijinta caddaalad iyo ku dhaqanka heshiisyada. Sidoo kale, waa in la tixgeliyaa arrimaha la xiriira amniga, helitaanka, iyo suurtagalnimada caasimadda, iyadoo la xoojinayo isku-duubnida bulshada.

3. **Adkaynta Hannaanka Dhismaha Dawlad-goboleedka iyo Awood-qaybsiga:** Xoojinta maamulka waxay u baahan tahay in si rasmi ah loo dejiyo hannaan loo dhan yahay oo lagu dhisayo dawlad-goboleedka, laguna salleeyo xeerar sharci oo la fulin karo. Waa in la hubiyaa matalaad caddaalad ah oo ay helaan beelaha, haweenka, dhalinyarada, iyo bulshooyinka kale ee la hayb-sooco si looga hortago ka reebitaan iyo khilaafaad mustaqbalka ah. Gorgortanka siyaasadeed iyo doorashooyinka waa inay noqdaan kuwo hufan si loo ilaaliyo heshiisyadii hore, gaar ahaan heshiiskii awood-qaybsiga ee 2016. Ugu danbeynna awood-siinta goleyaasha degmooyinka si ay uga qayb qaataan go'aamada kheyraadka iyo siyaasadda ku aaddan, arrintani waxay kor u qaadi kartaa awoodda maamulka gudaha sida dawladaha hoose.

4. **Xoojinta Sharciyadda Dawlad-goboleedka iyo Awoodda Maamulka:** Si loo gaaro xasillooni waari karta waxa loo baahanyahay in maalgashi xooggan lagu sameeyo maamulka dadweynaha, dib-u-habaynta garsoorka, iyo sare u qaadidda bixinta adeegyada. Dib-u-habayn lagu sameeyo hay'adaha dowliga ah oo diiradda saaraya daahfurnaan, isla-xisaabtan, iyo shaqaaleysiin ku saleysan karti ayaa iyaduna yareyn karta saameynta beelahu ku leeyihiin siyaasadda iyo maamulka. Xoojinta hay'adaha sharci fulinta, gaar ahaan maxkamadaha iyo booliska, waa lama huraan si loo xalliyo khilaafaadka loona yareeyo colaadaha beelaha.

5. **Xoojinta Amniga iyo Xasilloonida:** Hirshabeelle waxay u baahan tahay istiraatiijiyad amni oo mideysan oo ku saleysan ka-qaybgalka bulshada. Waa in la mideeyo dhammaan jilayaasha amniga, oo ay ku jiraan Macawiisley, Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed, ATMIS, iyo booliska, laguna mideeyo hannaan amni oo qaabdhismeed leh. Dawladda Federaalka waa inay hirgelisaa barnaamij dhammaystiran oo DDR (hub-ka-dhigis, kala dirid, iyo isku-dhaf) si loo yareeyo maleeshiyaadka beelaha iyo tartanka ku saabsan isbaaro dhigashada. Sidoo kale, waa in la xoojiyaa wada-shaqaynta amni ee u dhexeysa heer federaal iyo heer dawlad-goboleed si loola dagaallamo Al-Shabaab, iyadoo bulshada deegaanka si firfircoon loogu darayo qorshaha amniga.

6. **Wax ka Qabashada Tabashooyinka Beelaha iyo Xoojinta Isku-duubnida Bulshada:** Xallinta tabashooyinka beelaha iyo dhisidda isku-duubnida bulshada waa arrin mudnaan leh. Waa in la sameeyaa madallo dib-u-heshiisiin oo joogto ah oo ay ka qayb qaataan odayaasha dhaqanka, culimada, iyo bulshada rayidka ah si wax looga qabto tabashooyinka soo jireenka ah. Xoojinta wada-shaqaynta beelaha iyada oo loo marayo qaab-dhismeedyada maamulka dawladaha hoose ama degmooyinku waxay yareyn karaan isku-dheellitir la'aanta awoodda. Sidoo kale, barnaamijyo horumarineed oo bartilmaameedsanaya bulshooyinka la dayacay ayaa muhiim u ah wax ka qabashada haybsooca.

# 8. Tixraacyo

1. Ahmed, I. (2020). Political mistrust and governance challenges in Somalia. Mogadishu University Press.
2. Andrea Carboni, ACLED Africa (2022). A Turbulent Run-up to Elections in Somalia. Accessed at: https://acleddata.com/2021/04/07/a-turbulent-run-up-to-elections-in-somalia/
3. Berghof Foundation. (2023). Conflict Transformation and Reconciliation in Somalia: Lessons for Local Peacebuilding. Accessed at: www.berghof-foundation.org
4. Berghof Foundation. (2017). Conflict Assessment Report. Hirshabelle State. Accessed at https://berghof-
5. Bradbury, M. (2008). Becoming Somaliland. James Currey.
6. Elite Bargains and Political Deals projects: Somalia Case Study 201. Accessed at: https://assets.publishing.service.gov.uk/media/5c191358ed915d0c3d63f6ab/Somalia_case_study.pdf
7. Focus Group Discussion Data Hirshabelle, Hiraan, (Cadale).
8. Horn Observer. (2024). Eight Years of Hirshabelle: Celebrations Amid Stagnation in Security, Reconciliation, and Humanitarian Crisis. Accessed at: www.hornobserver.com
9. International Crisis Group (ICG). (2018). Somalia: Transforming clan dynamics. ICG Reports.
10. Kaplan, S. (2019). Fixing fragile states. Praeger Security International.

11. OECD. (2020). Security Sector Governance and Reform. OECD Publishing.

12. World Bank. (2023). Somalia Economic Update 2023. World Bank Group.

13. Jowhar conference opens despite Hiiraan elders' boycott. Accessed at: https://hiiraan.com/news4/2016/Jan/103544/jowhar_conference_opens_despite_hiiraan_elders_boycott.aspx foundation.org/files/publications/Berghof_Conflict_Assessment_Report_HS_EN_Final.pdf

14. Menkhaus, K. Elite Bargains and Political Deals projects: Somalia Case Study 2018. Accessed at: https://assets.publishing.service.gov.uk/media/5c191358ed915d0c3d63f6ab/Somalia_case_study.pdf

15. Platform for Political Dialogue and Somali Public Agenda. "Hirshabelle's Political Settlement: Opportunities for Meaningful and Inclusive Political Processes." Policy Brief SDP.01, February 2023.

16. Somalia: A Country Study (1992). Accessed at: https://tile.loc.gov/storage-services/master/frd/frdcstdy/so/somaliacountryst00metz_0/somaliacountryst00metz_0.pdf

17. Somali Public Agenda (2020). The Hirshabelle election conundrum. Accessed at: https://somalipublicagenda.org/the-hirshabelle-election-conundrum/

18. SPA and SDP brief, Focus Group Discussion (Cadale).

19. Transparency International. (2022). Corruption Perceptions Index 2022. Transparency International.

20. UNDP. (2021). State-building in fragile contexts. United Nations Development Programme.

21. UN OCHA. (2024). Flooding and Humanitarian Challenges in Hirshabelle. Available at: reports.unocha.org\

22. As African Union Mission in Somalia Draws Down, Al-Shabaab Remains Threat to Country, Region, Special Representative Tells Security Council. Accessed at: https://press.un.org/en/2023/sc15457.doc.htm

23. Vanda Felbab-Brown (2023). Somalia's challenges in 2023. Accessed at: https://www.brookings.edu/articles/somalias-challenges-in-2023/

HERITAGE
INSTITUTE

Luulyo 2026